HAY'ADDA GAADIIDKA AAGGA MAGAALADA WASHINGTON



# QORSHAHA KA QAYBQAADASHADA DADWEYNAHA 2020 - 2023

Hay'adda Gaadiidka Aagga Magaalada Washington (Washington Metropolitan Area Transit Authority) (Metro) waxay ku dadaalaysaa in ay noqoto hogaamiyaha ka qayb qaadashada bulshada ee uu gaadiidku quseeyo, gaarsiinta iyo xiriirka. Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan) (PPP) ee Metro wuxuu caddaynayaa ka go'naanshaha Metro ee ka qayb qaadashada dadweynaha ayada oo noqonaysa qalabka hagitaanka si loogu damaanad qaado macaamiisha iyo xubnaha bulshada in ay helaan macluumaad tayo sare leh, fursado xiriiro iyo jawaab celin ku wareegsan mashruucyada la qorsheeyay iyo in la buuxiyo waajibaadka federaalka.

metro

**CUTUBKA 1 AAD: MABAADII`DA KA QAYBQAADASHADA DADWEYNAHA EE METRO**

Mabaadii`da Hagaysa.......................................................................................................................................1-2

Ujeedooyinka iyo Hadafyada ee Matro ee loogu talagalay Ka qayb qaadashada Dadwaynaha ..............................3

Natiijooyinka Muhiimka ah ee ka imaanaya Horumarinta Asalka ah ee Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadwaynaha .4

Kuwa ku lugta leh Metro Qorshaha Ka qayb qaadashada Daweynaha (Public Participation Plan) ..........................5

Dadyowga Goobaha Adeegga .........................................................................................................................6-7

Macmiilka Metro Dadka.......................................................................................................................................8

Qiimaynta ee Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadwaynaha ....................................................................................9

**CUTUBKA 2 AAD: TILMAAMAHA LOOGU TALAGALAY XIRIIRKA DADWEYNAHA IYO GAARSIINTA MASHAARIICDA QORSHAYSAN**

Hindisidda Mashruuca ...................................................................................................................................12-14

Hormarinta Qorshaha Xiriirada .........................................................................................................................15-21

Fulinta Qorshaha Xiriirada...................................................................................................................................22

La socoshada, Dabagalka iyo Ka warbixinta .........................................................................................................23

**CUTUBKA 3 AAD: 2017-2020 PPP OO DIB U EEGIS AH**

Iftiiminta Mashruuca ......................................................................................................................................25-27

Hanaanka Maaraynta Ka qaybqaadashada Bulshada iyo Warbixinta Cabirada Shaqada PPP ee Saddex sanadlaha ah.......................................................................................................................................28-29

U doodidda Wax ku biirinta Bulshada....................................................................................................................30

La shaqaynta Ururada Bulshada ..........................................................................................................................31

Helitaanka Luuqadda ....................................................................................................................................32-33

Bilaabidda Kooxda Shaqada Sinaanta ee Metro.......................................................................................................34

Tababarka ........................................................................................................................................................35

Habka Shaqada ..................................................................................................................................................36

La qabsiga Xaaladda Caadiga ah ee Cusub.............................................................................................................37

**QORAALADA (waxaa lagu bixinayaa faylal PDF oo kala gaar ah)**

Qoraalka A: Dib u eegista Shuruudaha Wadajirka Metro iyo Federaalka

Qoraalka B: Xogta Astaanta Dadka

Qoraalka C: Dib u eegista Hay`adda Gaadiidka Peer (Peer Transit Agency)

Qoraalka D: Liiska Howlaha Gaarista


# CUTUBKA KOOWAAD: MABAADII`DA KA QAYBQAADASHADA DADWEYNAHA EE METRO

Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadweynaha ee Metro waxaa lagu saleeyay mabda'a in howlaha ka qaybqaadashada dadweynaha loo samayn doono hanaan macquul ah, oo loo dhanyahay, lagana wada shaqeeyay kaasoo raadinaya helitaanka dadaalka qaanuunka ah iyo kan aan qaanuunka ahayn ee khuseeya go`aan gaarista Metro ee ku saabsan siyaasadaheeda iyo adeegyadeeda.

Maadaama ay hesho lacago ka yimaada federaalka iyo marka la eego Xeerka IV ee Xeerka Xaquuqul insaanka ee soo baxay 1964, Metro waa in Maamulka Gaadiidka ee Federaalka (Federal Transit Administration) (FTA) u gudbisaa Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadweynaha kaasoo faahfaahinaya qorshaha iyo istiraatiijiyadda Maamulku uu wax uga qabanaayo dadka laga tirada badanyahay iyo kuwa Xirfaddooda Luuqadda Ingiriisku Xaddidan tahay (Limited English Proficient) (LEP) iyo howlaheeda qorshayaasha iyo barnaamijyada ah. Kuwa qaata lacagaha federaalku waxay haystaan "fursad aad u balaaran" oo ah in ay go`aan sadaan "sida, goorta, iyo inta jeer ee howlaha ka qayqaadashada dadweynuhu ay dhacayso," laakiin go`aanadaan waa in ay kaalmaynayso falanqayn lagu sameeyo dadyowga iyo natiijada dadaalka la galiyay (sida, kormeerka iyo tayada cilmibaarista) ee lagu helay soo saaristii qorshaha ka qaybqaadashada dadweynaha.

Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan) (PPP) ee WMATA waxaa markii ugu horeysay la sameeyay sanadkii 2013 asaga oo qaatay sanad dhan, waxaa uuna ahaa hanaan talaabooyin badan soo maray waxaana hogaaminayay koox ka socota dhammaan waaxyaha. Hanaanka soo saarista ee dhammaystiran oo ay kujiraan dib u eegista shuruudaha federaalka, dib u eegista hab dhaqanka ugu wanaagsan ee toban hay`adaha gaadiidka ah oo kajira dhammaan wadanka, wareysiyada xubnaha kooxaha shaqaalaha iyo guddiga, kormeerista Ururada Bulshada ayada oo la adeegsanaayo Xeerka VI iyo shucuubta kale ee ay adagtahay in lala xiriiro ee jooga goobaha adeegga WMATA, iyo olalaha kormeerka guud ee dadweynaha. PPP waxaa ogolaaday Guddiga Agaasimayaasha ee WMATA Sebteembar 2014 iyo Hay`adda Gaadiidka ee Federaalka (Federal Transit Administration) Janaayo 2015.

Inkastoo qorshahaan loo sameeyay si loo raaco shuruudaha Xeerka VI, qaabka shaqadeeda waxaa loo diyaariyay in loo isticmaalo dhammaan dadaalada xiriirada Maamulka ee ku xeeran mashaariicda la qorsheeyay, haddii ay ahaadaan kuwo "loo baahan yahay" iyo haddii kaleba. Xiriirka dadweynaha iyo howlaha ka qaybqaadashada Metro ee soo galaya qorshahaan waxaa loo diyaariyay in ay noqdaan kuwo ay heli karaan dhammaan dadka ayada oo loo samaynayo lagana faaidaysanayo istaraatiijiyado sare u qaadaya gaaritaanka kooxaha leh dhibaatooyinka iyo/ama caqabadaha xaddidi kara ka qaybqaadashadooda.




# **Mabaadi'da hagida** ee Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadwaynaha

Daabacaaddaan 2020-2023 ee Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadweynaha waxaa loo cusboonaysiiyay si uu uga tarjumo qiimaynta WMATA ee xiriirka iyo kormeerka dadweynaha illaa intaa kaddib, taasoo ay kujiraan tilmaamo ka imaanaya maamulka cusub, guusha iyo casharka laga bartay, iyo waxa ka badelka qaab dhismeedka ururka.

Ururka Caalamiga ah ee Ka qayb qaadashada Dadweynaha (International Association of Public Participation) (IAP2), hogaamiyaha horumarinta iyo sare u qaadidda ku dhaqanka ka qayb qaadashada dadweynaha aduunka oo dhan, ayaa soo saaray Mabaadii`da IAP2 si uu gacan uga gaysto in la sameeyo go`aano wanaagsan kuwaas oo ka tarjumaya danaha iyo tabashooyinka dadka iyo shirkadaha ay saamayn karto. Qaar badan oo kamid ah Mabaadii`daan waxay ka tarjumayaan ujeeddada hadafyada Metro ee ku aadan dhammaan ka qayb qaadashada iyo xiriirka dadweynaha, kuwaas oo ay kamid yihiin:

- Ka qayb qaadashada dadweynuhu waxay raadinaysaa fududaynaysaana ku luglahaanshaha kuwa laga yaabo in uu saameeyo ama loola danleeyahay go`aanka.
- Ka qayb qaadashada dadweynuhu waxay ka raadinaysaa wax ku biirin ka qayb qaateyaasha diyaarinta sida ay uga qayb qaadan lahaayeen.
- Ka qayb qaadashada dadweynuhu waxay ka qaybqaateyaasha siinaysaa macluumaadka ay uga baahan yihiin si ay uga qaybqaadan lahaayeen qaab micno leh.
- Ka qayb qaadashada dadwaynuhu waxay kala hadlaysaa ka qaybqaateyaasha sida wax ku biirintoodu u saamaysay go`aanka.

Ayada oo raacaysa Mabaadii`daan iyo hanaan baaritaan oo adag intii ay kujirtay abuurista PPP, Metro waxay samaysay mabaadii`da hagaysa, ahdaafta, iyo ujeedooyinka muujinaya falsafadda Maamulka ee ku aadan, iyo dadaalka balaaran ee ay ku bixinayso, ka qayb qaadashada dadwaynaha, sinaanta, iyo adeeg dadweyne oo wanaagsan. Mashaariicda ka shaqaysiinaya Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha, waa in mabaadii`daan la raacaa.



## 1 Hadafka Koowaad: Mid loo dhan yahay

Si firfircoon u fududaynaya ku luglahaanshaha dhammaan bulshooyinka uu saamayn karo hanaanka ka qayb qaadashada dadweynuhu.

**Ujeeddada:**

- Siinta waxyaabo xiriirka ku saabsan iyo adeegyo tarjumaad ah kuwaas oo buuxinaya baahiyaha bulshooyinka ay Metro u adeegto, kuwaas oo ay kujiraan (laakiin aan ku koobnayn) xirfadda luuqadda Ingiriiska oo xaddidan ama aan jirin (limited and no-English proficient) (LEP/NEP), aqoon yarida, iyo dadka naafada ah.
- Xaqiijinta in bulshooyinka laga tirada badan yahay iyo kuwa Xirfaddooda luuqadda Ingiriisku xaddidan tahay (LEP) ay u arkaan in isirkooda, faracooda, iyo luuqadahooda lagu muujiyay howlaha kormeerka ah iyo waxyaabaha xiriirka loo isticmaalo.
- Ku daridda qaababka tixgalinaya baahiyaha bulshooyinka dakhligoodu hooseeyo.
- Ku daridda qaabab badan oo falgal ah kuwaas oo aqoonsanaya waxna ka qabanaya caqbadaha kale si loo helo (sida, jirka, dhaqaalaha, teknoolojiyadda, iyo dhaqanka).

## 2 Hadafka Labaad: Wadashaqayn

Ula shaqaynta si wadajir ah bulshada dhammaan inta lagu jiro qorshaynta iyo hanaanka soo saarista mashruuca.

**Ujeeddada:**

- Korinta xiriir joogto ah micnana leh oo lala yeesho ururada bulshada, kuwaas oo ay kamid yihiin kuwa aan faaido doonka ahayn, kooxo dhaqameedka, iyo ururada kiraysteyaasha/ama xaafadleyda ah.
- Helidda wax ku biirin wakhti hore ah si loo ogaysiiyo go`aan qaadashada.
- Kula xiriiridda macluumaad faahfaahsan, si fudud loo fahmi karo oo ah qaab wakhtiyaysan taasoo u ogolaanaysa dadweynaha in ay bixiyaan jawaabcelin ay ka dheragsan yihiin.
- Isticmaalidda istiraatiijiyado kala duwan oo la heli karo kuwaas oo fududaynaya falcelinta ka imaanaysa dhammaan xubnaha bulshada.
- Xaqiijinta saaxiibada maamulka gudaha iyo xubnaha Guddiga Netro in ay ka shaqeeyaan, laguna daro, howlaha kormeerka ah marka bulshadooda la saameeyo.

## 3 Hadafka Saddexaad: Ka jawaabaya

Si firfircoo u xiriirinaya falcelinta dadweynaha iyo natiijooyinka si loo dhiso is aaminaadda.

**Ujeeddada:**

- Siinta waxyaabihii ugu danbeeyay iyo natiijooyinka shaqooyinka si toos ah ka qaybqaateyaasha ayada oo lagu siinayo muddo macquul ah.
- Si cad uga hadlidda sida wax ku biirinta dadweynaha loogu isticmaalay soo saarista talooyinka ugu danbeeya.
- U abuuridda fursado falcelinta dadweynaha kuwaas oo ku saabsan waxyaaba guud ee ay danaynayaan ama tabanayaan.

## 4 Hadafka Afraad: Joogto ah


Xaqiijinta tilmaamo la sameeyay oo ka imaanaya Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan) in la raaco dhammaan Metro.

**Ujeeddada:**

- Xaqiijinta joogtaynta iyo tayada qorshaynta iyo samaynta xiriirka bulshada iyo howlaha ka qaybqaadashada ayada oo la isticmaalaayo Xafiiska Metro ee Macluumaadka & Xiriirka Istiraatiijiyadaysan (Metro's Office of Content & Strategic Communication).
- Samaynta xiriir bulsho oo sharci iyo macquul ah iyo kormeer.
- Kala hadlidda natiijooyinka ku luglahaanshaha dadweynaha dhammaan shaqaalaha ay khusayso iyo Guddiga Agaasinka Metro.
- Qiimaynta waxtarka natiijooyinka kormeerka bulshada taasoo leh talaabooyinka waxqabadka ee ay samaysay Metro iyo hirgalinta tallaabooyinka wax lagu saxaayo sida ugu habboon.



# **Natiijooyinka Muhiimka ah ee ka imaanaya Horumarinta Asalka ah** ee Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadwaynaha




Natiijooyinka ugu Waaweyn ee laga helay saa saaristii hore ee Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan) waa kuwo run ka ah daabacaaddaan. Natiijooyinkaan ayaa loo isticmaalay in lagu qaabeeyo qorsheyaasha xiriirka iyo kormeerka saldhig adagna ay u siiyaan qaar badan oo kamid ah guulahaan. Hoos waxaa kujira nooc wax laga badalay oo ah natiijooyinkii ugu waa weynaa taasoo ay tahay in wali maanta ay Metro raacdo.

- Si aad ugu luglahaato bulshooyinka Xeerka VI, tag meesha ay joogaan. Ku qabashada xalfad ama gaynta macluumaadka meelaha dadka laga tirada badan yahay, kuwa dakhligoodu hooseeyo, iyo dadweynaha xirfaddooda luuqadda Ingiriisku xaddidan tahay ama aysan jirin — sida xarumaha gaadiidka, bixiyeyaasha adeegga dadweynaha, xarumaha dukaamaysiga, tababarada, shaacinada loo danleeyahay iyo dabaal degyada — ayaa ah qaabka ugu waxtarka badan ee gaarista shucuubtaan.
- Muujinta xasaasiyadda dhaqanka. Aqoon u lahoow dadka aad la hadlayso adiga oo keenaya dadka Metro ka socda ee ku habboon (waxyaabaha looga baahan yahay, xirfad dhanka dhaqanka, iyo luuqadda ah) madalada iyo kulamada iyo muujinta matalaadda ku haboon ee walxaha.
- Ka dhig mid lagu kalsoon yahay in la tago madalada iyo qaababka samaynta madalada doorbididda kooxaha wax ku biirintooda la raadinayo. Qaababka kulamada waa in loo diyaariyaa doorbididda kooxaha gaarka ah ama bulshooyinka – waxaana kamid ah kuwa fool-kafoolka ah iyo kuwa fogaan aragga ah. Waa in sidoo kale laga fikiraa kusoo daridda caruurta, sida siinta caruurta howlaha taasoo u oggolaanaysa in waalidiintu ay soo xaadiraan kana qaybqaataan kulanka.
- Tarjun walxaha una isticmaal qaab caalam laga aqoonsan yahay. Walxaha macluumaadka ah waa in ay ku diyaarsanaadaan luuqadda dadka lala hadlayo ee ay doorbidayaan waana in loo diyaariyaa si dhaqan ahaan ku haboon ayada oo laga fakarayo dadka lala hadlayo ee loola danleeyahay iyo ayada oo la abuurayo fariin cad oo wadata isticmaalka jaantuska iyo isticmaal wac ku ool ah oo ah qoraalka.
- Isticmaal warbaahinta luuqadaha kal duwan waxaadna kala duwdaa ilaha qaybinaya. Walxaha waa in lagu qaybiyaa ilo kala duwan iyo goobaha gaadiidka badan, oo ay kujiraan baska, meelaha basku istaago, iyo xarumaha tareenada Metro. Walxaha waa in sidoo kale loo qaybiyaa goobaha aan sidaa xiriirka ula lahayn gaadiidka, sida Ururada Bulshada, maktabadaha, bakhaarada cuntada, iyo meelaha la degan yahay. Xayaysiiska lagu sameeyo jaraaidka wali wey shaqaynaysaa waana qaab dad badan ay doorbidaan in ay ku helaan macluumaadka bulshada.
- Aqoonso oo isticmaal wax ku biirinta. Waa in ay ahaataa caddayn waadax ah sida wax ku biirinta dadweynuhu loogu isticmaali doono go`aan gaarista.
- Samee hanaan shaqo oo dhisan oo loogu tala galay ka qayb qaadashada dadweynaha taasoo ay kamid yihiin waax hogaamisa. Waaxda waa in si gaar ah loogu xilsaaro la socoshada ka qaybqaadashada dadweynaha iyo/ama hanaan fududaynaya ku luglahaanshaha dhowr waaxood.
- La shaqee Ururada Bulshada si loo dhiso xiriir iyo is aaminaad ka dhexjirta dhammaan dadweynaha kala duwan. Kooxahaan aan faaido doonka ahayn waxay taageeraan bulshada deegaanka waxayna kamid yihiin ilaha ugu waxtarka badan ee laga heli karo hay`ad gaadiid taasoo loo isticmaali karo fududaynta xiriirka joogtada ah ee loo baahan yahay si loo dhiso is aaminaadda iyo xiriir labada dhinacba faaido u leh.
- Isticmaal tabo kala duwan si aad ereyga banaanka u keento. Ka fikir adeegsiga tabaha kale, sida isticmaalka inta jeer ee qaybinta kaarka warbixinta ardayda si aad macluumaad uga hesho qoysaska ama kormeerka albaab-ka-albaabka ah ee goobaha loo danleeyahay.
- U isticmaal teknoolojiyadda si habboon. Ayada oo qayb ku leh ka qayb qaadashada daweynaha, teknoolojiyaddu waa in ay dhammaystirtaa qaababka kale ee kormeerka. Inkasta oo isticmaalka teknoolojiyaddu noqday mid aad ugu muhiim ah ka jawaabidda safmarka Covid-19, ka fikir dadka aad la hadlayso iyo baahiyaha helitaanka si ay u noqoto mid loo dhanyahay.
- Istcmaal madal bulsho oo soo noqonoqota si aad xubnaha bulshada ugu ogolaato in ay falcelino siiyaan Metro kuwaas oo khuseeya arimaha ay tabanayaan. Falcelinadaanu waxay dhammaystirayaan fursadaha horey u jiray si looga faaloodo mashaariic gaar ah, soo jeedino, iyo qorsheyaal.

**Shuruudaha Wadajirka ee Metro iyo Federaalka**

FTA's Circular 4702.1B "Shuruudaha iyo Tilmaamaha Xeeka VI (Title VI) ee Ka faaidaysteyaasha Maamulka Gaadiidka Federaalka" ayaa ah isha koowaad ee shuruudaha iyo tilmaamaha federaalka ee loogu tala galay u hogaansamidda Xeerka VI (Title VI), laakiin ma ahan shuruucda federaalka ee kaliga ah ee taasoo siinaysa tilmaamaha xiriirka bulshada iyo kormeerka oo ah mid buuxa, cadaalad ah, micno weynna ku fadhiya.

Ayada oo ah ka faaidaystaha dwwqaha hanaanka goobaha magaaloobay ee FTA, Metro waa in ay sidoo kale siisaa fursado dhegaysiga bulshada ayna samaysaa macluumaad u diyaarsan bulshada. FTA iyo Waaxda Gaadiidka Maraykanku (U.S. Department of Transportation) (USDOT) waxay sidoo kale ku hagaan hay`adaha gaadiidka in ay ka shaqeeyaan mabaadii`da cadaaladda deegaanka marka ay samaynayaan qorsheyaashooda, mashaariicdooda, iyo howlahooda si ay uga hortagaan saamaynada badan ee xunxun ee ay ku yeelanayaan bulshooyinka laga tirada badan yahay iyo kuwa dakhligoodu hooseeyo. USDOT, sida hay`adaha kale ee federaalka ah, waxay u baahan tahay ku luglahaanshaha dadweynaha ee hanaanka dib u eegista deegaanka ayada oo la adeegsanayo Xeerka Siyaasadda Qaranka ee Deegaanka (National Environmental Policy Act) (NEPA).

Wadajirka Metro waxa uu sidoo kale siiyaa tilmamaaha ku saabsan shuruudaha ka qayb qaadashada daweynaha, kuwaas oo ay kamid yihiin macluumaad ku saabsan shuruudaha Dhegaysiga Dadweynaha iyo tilmaamaha. Tafaasiil dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha Wadajirka Metro iyo Federaalka waxaa laga eegi karaa *Qoraalka A: Dib u eegista Shuruudaha Wadajirka Metro iyo Federaalka*

**Hindisaha Hogaanka Hadda jira**

Guddiga Agaasinka Metro, Maamulaha Guud/Madaxa ugu sareeya iyo Kooxda Maamulka Fulintu waxay diiradda saarayaan in ay ka dhigaan Metro bixiyaha gaadiidka iyo shaqaalaysiiyaha la doorto ee Gobolka Caasumadda Qaranka. Waxay sanadihii danbe ka shaqeeyeen in ay sare u qaadaan mashaariicda ayna hantaan aaminaadda dadka ee badqabka hanaanka Metro, waxay sare u qaadeen shaqooyinka wakhtiyaysan ee tareenka iyo baska, waxayna si wax ku ool ah u maareeyeen dhaqaakaha Maamulka si loo xaqiijiyo hor u socodka wanaagsan ee dhaqaalaha dadweynaha. Dadaaladaanu waxay keeneen sare u kac ku yimid gaadiidka kahor Covid-19, taasoo muujinaysa kalsoonida soo cusboonaatay ee ay dadku ku qabaan badqabka iyo hanaanka iyo isku halaynta.

Horaantii 2020 ayada oo gaadiidku sare u socday, safmarka Covid-19 waxa uu gobollka u keenay in uu hakado waxayna Metro uga jawaabtay ayada oo yaraynaysa adeegga basaska iyo tareenada oo dhan si ay u xaqiijiso badqabka shaqaalaheeda iyo macaamiisheeda, ayada oo sii waday in ay bixiso adeegga safarka lagama maarmaanka ah. Qorshaha Ka soo kabashada Safmarka ee Metro waxaa loo diyaariyay in uu buuxiyo baahiyaha gaadiidka ee gobolka ayada oo ilaalinaysa badqabka shaqaalaha iyo macaamiisha, waxayn adiyaarisay kala saarista howlaha ka dhigaya Metro in ay soo noqoto ayada oo xoogan una adkaysan karta howlaha cudurka safmarka ah ka danbeeya.

Isla wakhtigaas, Metro waxay sii wadaysaa in ay maalgashato hanaanka badqabka, isku halaynta iyo dhaqaalaha gobolka dhammaan 10keeda sano, barnaamij lacageed oo ku kacaya $15 bilyan oo doolar. Markii ugu horeysay taariikhda Metro, barnaamijka lacagta waxaa bixinaya lacag loo huray oo ka imaanaysa Maryland, Virginia, iyo District of Columbia. Ayada oo mashaariicdu ay sii soconayso sanadaha soo socda, Metro waxay diiradda saari doontaa la xiriiridda macaamiisha saamaynada ay dhismayaasha iyo mashaariicda dib u cusboonaysiintu labadaba ku leeyihiin safarkooda,


Gudiga Agaasimayaasha ee Metro, maamulaha guud, iyo xubnaha hogaamiyayaasha ee metro waxay direen fariin aad u cad oo ku saabsan ka go´ naanshiyohooda in loo safro si isku mid ah, doorka muhiimka ah ee talada dadwaynuhu u leedahay dadaalada guusha ee Metro.

*Maamulaha guud ee Metro|CEO iyo kooxda maamulka fulinta waxay diirada saarayaan samaynta bixiyaha qaadista iyo shaqo bixiyaha gudaha caasumada gobolka qarannka.*




**Fahamka dabeecada iyo baaxada ciwaanka afaraad (VI) ilaalinta dadweynaha ee adeega metro dhexdiisa waxay bixinaysaa macnaha guud ee nugaylka-dhaqan ahaan, habka loo habeeyey la xiriirka iyo gaarsiinta**

Metro waxay u adeegtaa afar milyan oo qof 1500 iskuweer-mayl gudaheed Aaga safarku waxa uu ka koobanyahay dagmada Columbia, gobolada Mayland ee Montgomery iyo Prince George's, gobolada Waqooyi ee Varginia Arlington, Fairfax iyo Loudoun iyo the magaalooyinka Alexandria, Fairfax iyo Falls Church. Guud ahaan, 45% kuwa ka shaqaynaya xudunta hoose ee-Washington iyo qaybo kamida Gobolka Arlington -waxay isticmaalan gaadiidka dadwaynaha. Astaanta dadka ee goobtaan adeega waa dadka lagatirada badanyahay 60%, 9% ee guryaha ee goobta adeega waa kuwo jooga ama ka hooseeya xadka saboolnimada (ka arag hoos).



Goobta adeega ee Metro waxaa ka mid ah kuwo badan oo kuhadalka luuqada Ingiriisku ku yartahay kana tirsan luuqadaha kala duwan ee laga tiradda badanyahay. Sida laga soo xigtay tirakoobkii 2015 ee U.S. Xog aruurinta shansano ee Bulshada America waxay qiyaastaa 11.5% ee tirada dadka ee da'da shansano ama ka wayn ee dagan goobta adeega waa dadka luuqadooda ingriisku yartahay (LEP). Guryahay looga hadlo Spanishka waxay ka yihiin 60% guud ahaan guryaha LEP ee goobta adeega. Luuqadaha kale ee ugu sareeya waxaa ka mid ah Mandarin Chinese, Korean, Vietnamese, Luuqadaha Afrikaanka, Faransiis, Tagalog iyo Carabi







Metro waxay si joogta ah u cabirtaa dadka iyo macaamiishu waxa ay ka koobanyihiin marka la fuulayo baska iyo tareenka waxayna xog aruurin ka samaysaa boosteejooyinka tareenada iyo basaska baxaya. Barnaamijkaan xog aruurinta ee rakaabka, kaas oo uu qabto xaafiiska cilmi baarista ee macmiilka, wuxuu raacaa waqtiga dhamaystirka ee fadaraalka.

Ayadoo lagu salaynayo macluumaadkaan la aruuriyey, Metro waxay u diyaarisay dadka laga tirada badanyahay iyo dadka dakhligoodu hooseeyo hanaan iyo hab qaadis (Metrorail iyo Metrobus). Dakhliga hoose waxaa loo tixgaliyaa guriga dakhligiisu ka yar yahay $30,000. Metro sidoo kale waxay samaysay astaamo luuqadeed oo loogu talo galay xarumahaan iyo layman lagu saleeyey xogta guryaha ee LEP xariiqin gaar ah gudeheed. Tafaasil iyo macluumaad dheeri ah oo ku saabsan asaamaha dad kaan waxaa ka eegi kartaa *Qoraalka B: Xogta Astaanta Dadka*.

**Astaanta Qofka Macmiilka Metro, DHAMAAN QAABABKA**




| **Kooxaha Dadka** | | |
|---|---|---|
| **Dadka laga tirada badanyahay** | 45% | 81% |
| **Madoow/Afrikaan Ameerikaan** | 26% | 58% |
| **Isbaanish** | 8% | 16% |
| **Aasiyan/Ka soojeeda jasiirada baasifiga** | 7% | 6% |
| **Dakhli hoose** | 13% | 46% |
| **Ingiriiskiisu yaryahay** | 5% | 27% |

# **Qiimaynta** ee Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadwaynaha (Public Participation Plan)

Metro waxa ay u heelantahay hormarinta guud ahaan maamulka dabagalka iyo qiimaynta darajo kasta, oo ay ka mid yihiin barnaamijyada tilmaamayaasha waxqabadka muhiimka ah kasoo dabagal ku sameeya barnaamijyada socda ama waqtiga fog ee dhanka hadafka istaraajiidiga ah ee Metro. Si aan dib ugu milicsano balanqaadka cabirka waxqabadka ugana dhabayso baahiyeheeda dib ucusboonaysiin ee ciwaanka barnaamijkeeda lixaad (VI ) seddexdii sano ee kasta, Qaabka cabirka ee waxqabad waxaa loo sameeyey labadaba qorshaha guud sidaas si lamida dadaalada mashruuca shaqsiyan.

Metro waxay is ticmashaa Hanaanka Maamulka Ka qaybqaadashada Dadwaynaha ee (Public Participation Plan, PPMS) Qalab raad raac online-ka oo adag lagu sameeyey gudaha si loo qiimeeyo cabirka waxqabadyadaan ayada ooy la socoto “casharadii la bartay” dhamaan mashaariicda. Shaqaaluhu waxay dib u eegaan natiijooyinkaan waxayna si googta ah ula kulmaan saamileeyda gudaha iyo kuwa dibadaba si ay ugala hadlaan guulaha iyo meelaha laga hormaray hababka hada iyo kuwa socda.




42 METRO CENTER

# CUTUBKA LABAAD: TILMAAMAHA LOOGU TALAGALAY XIRIIRKA DADWEYNAHA IYO GAARSIINTA MASHAARIICDA QORSHAYSAN

Metro waxaa soo maray waxqabadyada ka qaybqaadashada oo heerkeedu sareeyo tasoo ay sabab utahay tirada iyo cabirka saamaynta ku leh macaamiisha khaasatan barnaamijka koritaanka magaalada ee metro. Hawsha qorshaynta ee ka qaybqaadashada dadwaynaha ee jaangooynta Metro taas oo uu maamulay Xaafiiskeeda qanacsananta iyo xiriirka istaraatiijiga (Office of Content & Strategic Communication, CASC), wuxuu hubiyaa waafajinta Maamulka safarka ee Fadaraalka (Federal Transit Administration, FTA) xeerarka waxayna hubisaa xiriirka iyo hababka gaarista loogu talogalay mashaariicda qorshaysan ayadoo ay ku jiraan siyaasada abaabulada, si joogto ah, iskaashiga, iyo ka jawaabida baahiyaha bulshada. Xeeladaha la dhigay qorsha dhexdiisa waxay hubisaa kaladuwanashiyaha macmiisha saldhiga u ah ee Metro oo ay ka midyihiin dadka laga tirada badanyahay, iyo dadka ingriiskoodu yaryahay ama dadka aan ku hadlin, waa laga qaybgaliyaa lana wargaliyaa.

Markii uu mashruuc billoowdo uuna go'aansado inuu helo saamaynta bulshada ama macaamiisha— hadii ay hogaaminayso Metro gudeheeda ama ururada dibada ama qandaraaslayaal kuwaas oo mashaariicdoodu saamayn ku leedahay macaamiisha Metro — qorshaha mashruuca waa in loo sameeyo si loogu daro waxyaalaha taageeraya xiriirada firfircoon loona dhanyahay iyo istaraatiijiyada gaarsiinta. Cutubkaan soo socda wuxuu bixinayaa dulmarka hanaanka iyo tilmaamaha ay tahay in Metro iyo mashaariicda ku lamaansan in ay raacaan marka ay saamayn ku yeelanayaan macaamiisha ama bulshada ku wareegsan.



**Hindisidda Mashruuca**

Hormarinta Qorshaha Xiriirada

Fulinta Qorshaha Xiriirada

La socoshada, Dabagalka iyo Ka warbixinta

Markii mashruuc la bilaabo hadii uu yahay gudaha Metro ama mid banaanka ka ah lkn ku lamaansan hantida Metro, Mulkiillaha Mashruucu ama Maareeyuhu waa in uu ka fikiraa saamaynta uu ku yeelanayo macaamiisha iyo xubnaha bulshada dhamaan inta lagu jiro nolosha mashruuca iyo mudada kama danbaysta ah ee uu sii jirayo wax soosaarka ugu danbeeya. Maamulaha Mashruuca ama Maareeyaha waxaa loo xilsaaray inuu soo ogaado in mashruucu dhalinayo Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadwaynaha (Public Participation Plan), qiimaynta baaxada iyo saamaynta shaqada mashruuca, iyo la xariirida Xafiiska Metro ee macluumaadka iyo Istaraatiijiyada Xariirada (Metro's Office of Content & Strategic Communications) (CASC) si loo bilaabo hanaanka biloowga.

## Mashaariicda u Qalma

Metro waxay leedahay mashaariic balaaran oo kala duwan iyo hindisooyin taasoo dhalinaysa u hogaansamida Qorshaha Ka qaybqaadashada Dadwaynaha (Public Participation Plan) (PPP). Guud ahaan, mashruuc kasta oo la qorsheeyey — ama mashruuc aan dagdag ahayn — kaas oo saamayn ku leh macaamiisha Metro ama saamayn bulsho oo sharci ah, ama mashruuc u baahan falcelinta bulshada oo ka imaanaya hagitaanada kale sida Wadajirka Metro (Compact) ama FTA, waa inay raacaan tilmaamaha PPP. Mashaariicda kuwaas oo dhalinaya u hogaansimida waxaa ku jira, laakiin aan ku ekeyn:

**Daraasadaha & Baahinta**

Tusaaleyaasha waxaa kamid ah daraasadaha qorshaynta muddada fog iyo muddada dheer, waxaana kamid ah qorshaynta istiraatiijiyadaysan, mashaariicda qorshaynta goobta xarunta ah, ama daraasadaha basaska, tareenada, goobaha baabuurta la dhigto ama nooliga.

**Isbadelada dhismeyaasha, & Kaabeyaasha Deegaanka**

Tusaaleyaasha waxaa kamid ah hanaan iyo qaab cusub kaasoo saamaynaya hab dhaqanka macmiilka ama helitaanka safarka, furista, wax ka badalka iyo xirista goobaha macaamiisha, warbaahinta nooliga ama isbadalada dhanka iinka ah, iyo wixii lamid ah. Tani waxaa kamid ah mashaariic kasta oo u baahan qiimaynta deegaanka ee NEPA iyo warbixinada saamaynta iyo/ama wax ka badalka qorshaha gaadiidka dadweynaha.

**Isbadelada dhanka adeegga ah**

Tusaalooyinka waxaa kamid ah badalidda wadooyinka, dheerarka saacadaha ama joogtaynta adeegga, khaasatan kuwa lagu tilmaamo in ay yihiin isbadalo dhanka adeegga ah oo waaweyn kuwaasoo u baahan falanqayn siman iyo/ama Dhegaysiga Compact.

**Badalada Siyaasadda & Wax kabadalada Nooliga**

Tusaalooyinka waxaa kamid ah hindisooyinka siyaasadda ama wax ka badalada saamaynada macmiilka iyo wax ka badalada nooliga.

**Macluumaadka & Ogaysiiska Bulshada**

Tusaalooyinka waxaa kamid ah shaqo la qorsheeyay ama loo baahan yahay taasoo saamayn doonta macaamiisha Metro ama bulshada la saamaynayo, sida dhismaha gudaha ama hareeraha goobta Metro, waddada muddada dheer ee la qorsheeyay, mashaariicda dib u habaynta iyo dib u dhiska ah, iyo mashaariicda horumarinta/lamaan dhismaha/saamaynta kuwaas oo saamaynaya macaamiisha.

Mashariicda u baahan dhagaysiga dadwaynaha ayadoo la raacayo WMATA's Compact si toos ah u dhalinaya u hogaansamida PPP markii lagu daro xeerarka Compact.

Dayactirka degdega ah ama mashaariicda saamaynta ku leh macaamiisha, Metro waa inay samaysaa dadaalka looga baahanyahay si loo raaco baratakoolka loogu talagalay xiriirada iyo gaarsiinta markasta oo macquul ah

## Fahmidda Fursadaha Bulshada iyo Waxqabadka Macmiilka iyo saamaynada kujira Shaqada Mashruuca

Soo saarista Shaqada Mashruuca waa wakhti muhiim u ah Maareeyeyaasha Mashruuca iyo Mulkiileyaasha si ay u bilaabaan ka fikiridda macmiilka ama saamaynada bulshada iyo sida loola falgalo kooxahaan bixinta falcelinta inta lagu jiro mashruuca. Kani waa sidoo kale wakhtiga ugu wanaagsan si looga qaybgaliyo CASC soo saarista xiriirada qorshaha gaarista. Dhowr tusaale oo loogu tala galay in Maamuleyaasha Mashruuca iyo Mulkiileyaashu ay tahay in ay ka fikiraan raacistooda:

- Haddii heerka shaqada ee mashruucu ay u baahan tahay isbadelo dhanka howlaha ah, Maamulaha Mashruuca ama Mulkiiluhu waa in uu la shaqeeyaa daneeyeyaasha gudaha iyo saaxiibada sharciga ee ku habboon si ay u soo saaraan qorshe howleedyo la ogolaaday ama qorshaha Hagaajinta Waddooyinka (Maintenance of Traffic) (MOT). Arintaani waa in ay dhacdaa kahor bilaabashada hanaanka CASC.
- Haddii heerka shaqada ee mashruucu ay wali kujirto soo saaris ama ay saamaynayso ama istaraatiijiyadaha shaqada aan la ogaan karin inta lagu jiro heerkaan, Maamulha Mashruucu ama Mulkiiluhu waa in uu bilaabo hanaanka bilaabidda SASC laakiin waa in uu sameeyaa wakhti loogu tala galay xiliga macluumaadkaanu diyaar noqon doono.
- Haddii heerka shaqada mashruucu, amarka shaqada, heshiiska ama qandaraasku uu kujiro diyaarinta ayna tahay in saamaynta iyo waxqabadka maxmiilka ama bulshada lagu daro, hanaanka bilaabidda oo lajira CASC waa in uu si degdeg ah ku bilowdaa si uu ugu ogolaado kooxda mashruuca in ay ka qaybqaataan bixinta macluumaadka, qoraan habraaca qiimaynta ama ay dib u eegaan howlaha qabyada ah.
- Haddii mashruuc uu ugu danbaysta lahaanayo saamaynta macmiilka laakiin uusan hadda uusan lahayn xiriiro ama gaarista heerkiisa shaqada ama qandaraaska, Maamulha Mashruuca ama Mulkiiluhu wuxuu u baahan karaa in uu wax ka badalo heerka shaqada si uu ugu soo daro shaqooyinkaan ama uu ogolaansho uga helo CASC taasoo ah in shaqada lagu dhammaystiri karo ilo gudaha ah.

Si loo waafaqo ujeedooyinka istiraatiijiyadeed ee Metro loona xaqiijiyo heerka shaqada mashruuca, daneeyeyaasha gudaha ee ugu waaweyn waa in sidoo kale lagu soo daraa laga bilaabo bilowga mashruuca. Qaar badan oo kamid ah saamilaydaan ayaa awoodi doona in ay saadaaliyaan ama ay ogaadaan waxa ay tahay saamaynta uu mashruucu ku yeelan karo — khaasatan qorshaynta howlaha — kaas oo ay kamid yihiin waxa ay yihiin arimaha ka imaan kara iyo waxa ay yihiin talaabooyinka yaraynta ah ee la meel dhigi karo si loo yareeyo saamaynada macmiilka, bulshada iyo gaadiidka.

Waa mas`uuliyadda Mulkiilaha Mashruuca ama Maareeyaha in ay ogaadaan ayna kusoo daraan daneeyeyaasha ku haboon marka ay mashruuc hindisayaan. Marka saamilayda la ogaado, kulan bilow ah oo uu qabanayo Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu ayaa si weyn loogu talinayaa in uu qayb ka noqdo qorshaha bilowga ah waana in lagu daro wadaxaajoodyada tilmaamaya saamaynada macmiilka iyo bulshada.

Saamilayda Metro ee gudaha waxaa kamid noqon kara, laakiin aan ku ekayn:

***La taliyaha Guud:*** Compact-ga Metro, U hogaansamidda FTA ama NEPA, iyo wixii lamid ah.

***Waaxda Gaadiidka ee Booliska Metro/ Xafiiska Maareynta Xaaladaha degdega ah:*** Saamaynada soo galidda, habaynta xarunta, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska ADA ee Siyaasadda & Qorshaynta:*** U hogaansamidda ADA, saamaynada helitaanka wadda marista, saamaynada soo galidda/qaadaha/wiishka, xiridda goobta baabuurta la dhigto ee ADA, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Guddiga Xoghaynta:*** Xiriirada iyo ansixinada guddiga, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Qorshaynta Basaska:*** Saamaynada xiritaanka waddooyinka, boosteejada baska, wareegga ama saamaynada xarunta gaadiidka, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Madaxa Dayactirka Injineeriyadda waddada:*** Xaquuqaha gawaarida waaweyn iyo helitaanka, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Cilmibaarista Macmiilka:*** Tijaabada isticmaalaha, jawaabcelinta baahinta, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Fursadda Shaqaalaysiinta Loo simanyahay:*** Arimaha sinaanta, dib u eegista, iyo shuruudaha Qorshaha Kaalmada Luuqadda

***Xafiiska qaadeyaasha & Wiishashka:*** Saamaynada albaabka laga soo galo/qaadaha/ wiishka, habaynta xarunta, iyo wixii amid ah.

***Xafiiska Xiriirka Dowladda:*** Saamaynada aagga bulshada, ogaanshaha saraakiisha la doortay ama daneeyeyaasha madaxa banaan, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Dayactirka Shirkadda:*** Saamaynada albaabka, diyaarinta xarunta, dayactirka hantida xarunta, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Dhsimayaasha Guryaha & Goobaha gawaarida la dhigto:*** Oggolaanshiyaha, laymanka hantida, saamaynada xirista waddada, garaashka baabuurta la dhigto ama saamaynada qaybaha, saamaynada shuminta & wadidda, saamaynada baasakiilka & wadidda, iyo wixii lamid ah.

***Xafiiska Gaadiidka Tareenka:*** Saamaynada albaabka laga soo galo/qaadaha/wiishka, habaynta xarunta, iyo wixii amid ah.

CASC waxay sidoo kale diyaar u tahay in ay la taliso Mulkiileyaasha Mahruuca iyo Maamuleyaasha taasoo ku saabsan saamilayda gudaha ee ku haboon si kulamada mashruucu ay yihiin kuwo loo dhanyahay lagana dharagsan yahay bilowgaba.

## Hanaanka Bilowga: Xafiiska Macluumaadka & Xiriirada Istiraatiijiyadaysan (Office of Content & Strategic Communications)

Marka mashruuc loo aqoonsado in uu yahay mashruuc u qalma kaasoo dhalinaya u hogaansamidda Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan) lana go'aansado in macmiilka ama bulshadu ay saamaynayso ama la falgalku uu soo gali doono heerka shaqada mashruuca, Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu waxa uu la bilaabi karaa hanaanka billowga mashruuca Xafiiska Macluumaadka & Xiriirka Istiraatiijiyadaysan (Office of Content & Strategic Communications) (CASC), taasoo ah laan kamid ah waaxda Adeegga Dadweynaha, Xiriirada & Suuq gayn (Department of Customer Service,Communications & Marketing).

Mulkiilaha Mashruuca ama Maamulaha waxa ay mas'uul ka yihiin la xiriiridda Agaasimaha Xiriirka Mashaariicda Qorshaysan & Ka qayb qaadashada kujirta CASC si loo bilaabo hanaanka bilaabidda. Agaasimuhu wuxuu u xilsaarayaa Maamulaha Xiriirka Istiraatiijiyadaysan ama xubin kamid ahkooxda CASC in ay bilaabaan la sahqaynta Mulkiilaha Mashruuca ama Maamulaha qorshaha xiriirka. Hanaanka bilaabidda waa in uu dhacaa wakhti ka horeeya oo ku filan nolosha mashruuca si uu ugu ogolaado qorshaha xiriirka in la sameeyo lana meelmariyo, ayada oo ay lajirto helitaanka wax kasta oo ah ilo muhiim ah. Ayada oo ay ku xirantahay heerka mashruuca, tani waxay u baahan kartaa in ay ahaato meel un laga bilaabo laba billood illaa sanad kahor ogaanshaha ama falgalka saamaynta.



Mulkiilaha Maamulaha ama Maamuluhu wuxuu noqon doonaa ka qaybqaate firfircoon inta lagu jiro samaynta qorshaha xiriirka ee ku hareeraysan mashruucooda. CASC waxay u shaqayn doontaa in ay tahay Maamulaha Xiriirka Mashruuca si ay u xaqiijiso in dhammaan shaqooyinka kujira qorshaha la dhammaystiro iyo in ay siiso hagitaan ku saabsan fariimaha iyo xiriirada iyo tabaha gaaritaanka. Maamulaha Mashruuca ama Mulkiiluhu waxa uu sii ahaan doonaa in uu mas'uul ka noqdo maaraynta guud ee mashruuca (tusaale walxaha howlaha Guddiga, meekmarinada, warbixinada) waana in uu hubiyo tixraac kasta oo ah xiriirada iyo walxaha gaarista dib loo eego ayna u meelmariso CASC si hormaris ah daabacaadda/bandhigidda Guddiga Agaasinka ama daneeyeyaasha.

Qorshe kasta oo xiriir waxaa loo diyaariyay mashruuca, ayada oo lagu salaynayo heerka shaqada mashruuca, heerarka saamaynta macmiilka, jadwalka iyo miisaaniyadda. Hanaanka soo socda wuxuu CASC u oggolaanayaa in ay diyaariso qorshe kaasoo ah mid la fulin karo ayna xaqiijiso u hogaansamidda.

Mashaariicda banaanka laga hogaaminayo saamaynayana macaamiisha Metro, sida dhisme ku lamaan, kooxahaas mashaariicdu waa in ay u soo gudbiyaan qorshe xiriir CASC si ay dib ugu eegto una ogolaato.


Hindisidda Mashruuca

**Hormarinta Qorshaha Xiriirada**

Fulinta Qorshaha Xiriirada

La socoshada, Dabagalka iyo Ka warbixinta





## TALLAABADA KOOWAAD: Aruurinta Macluumaadka Mashruuca

Ayada oo qayb ka ah hanaanka bilaabashada, Mulkiilaha Mashruucu ama Maamuluhu waxaa uu mas'uul ka noqon doonaa ayna tahay in uu u diyaar garoobo in uu bixiyo macluumaadka soosocda:

| | |
|---|---|
| **Heerka Shaqada & Wakhtiga loogu tala galay** | Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu waa in uu bixiyaa tafaasiisha ku saabsan mashruuca, kuwaas oo ay kujiraan saamaynada iyo talaabooyinka wax looga qabanayo, uuna la wadaago soo jeedino kasta oo la sameeyay, is fahamyada ama warbixinada looga xaajoonayo heerka shaqada. Taariikhaha waaweyn, wakhtiyada kama danbaysta ah ee waxyaabaha la gudbinayo ama aqbalaadaha Guddiga, qiyaasta inta lagu jirayo shaqada, iyo wixii lamid ah waa in lagu daraa. Haddii wakhti qorshaysan oo la soo gudbiyay ay kujirto dhammaan shaqada mashruuca, Mulkiilaha Mashruucu ama Maamuluhu waa in uu soo saaro ama kala caddeeyo shaqada la xiriirta saamaynada macmiilka ama bulshada. |
| **Dadka la saamaynayo/loo dan leeyahay & Dadyowga** | Mulkiilaha Mashruuca ama Maamulaha waxaa ku waajib ah, in uu haysto aqoonta ugu wanaagsan, uu siiyo dulmar macmiisha iyo bulshooyinka kuwaas oo la saamayn doono iyo/ama danayn fara badan ku leh ama kaalin mashruuca. Macluumaadka tusmada dadyowga ayaa la doorbidayaa (dadka laga tirada badan yahay, kuwa dakhligoodu hooseeyo, kuwa xirfaddooda luuqadda Ingiriisku ay xaddidan tahay ama aysan jirin, kuwa curyaamada ah, kooxha da'da ah, iyo wixii lamid ah) laakiin haddii aysan Maamulaha Mashruucu ama Maamuluhu uusan aqoon, CASC waxay la shaqayn doontaa xafiisyada kale si ay u soo aruuriso macluumaadkaan. |
| **Ilaha & Miisaaniyadda La heli karo** | Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu waa in uu bixiyaa macluumaadka ilaha iyo miisaaniyadda la xiriirta dadaalada gaarista iyo xiriirada. Haddii asalka kharashka ama ilaha aan wali la cayimin, CASC waxay u samayn doontaa qiyaas kharash ah Maamulaha Mashruuca ama Mulkiilaha ayada oo qayb ka ah hanaanka qorshaynta. |
| **Ujeeddada Xiriirada Macmiilka iyo Bulshada & Wax ku biirinta** | Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu, ayaka oo haysta aqoontooda ugu wanaagsan, waa in ay bixiyaan in ay rumaysan yihiin in ahdaafta xiriiradu ay yihiin iyo, haddii ay khusayso, waxa ay tahay jawaabcelinta ay jeclaan lahaayeen in ay helaan (tusaale waxyaabaha ku biirinta ah ee ka caawinaya shaqaalaha in ay go'aan qaataan?. Qeexitaanka ahdaaftaan ayaa looga baahan yahay mashruuc kasta waxayna CASC ka caawin doontaa samaynta fariimaha saxda ah iyo tabaha ay u isticmaali lahayd dhammaan inta lagu jiro qorshaha xiriirada. Tusaaleyaasha waxaa kujiri kara, laakiin aan ku ekayn:<br>• **Wadashaqaynta:** WMATA/Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu waxaa uu rabaa in uu dadweynaha kala shaqeeyo mashruuca, taasoo ay kamid tahay in uu si toos ah ugala shaqeeyo falanqaynta, waxyaabaha badalka noqon kara, iyo/ama go'aan la gaarista dadweynaha. Waxaa kamid noqon kara soo saaraysta waxyaabo badal noqon kara iyo aqoonsiga xalalka la doorbidayo.<br>• **Wadatashiyada:** WMATA/Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu wuxuu u baahan yahay in uu dadweynaha kala tashado mashruuca, taasoo ay kamid tahay helitaanka jawaabcelinada ku saabsan falanqaynta, waxyaabaha badalka ah, iyo/ama go'aanada ay soo saaraan shaqaalaha mashruucu ama Guddigu.<br>• **Macluumaadka:** .WMATA/Mulkiilaha Mashruucu ama Maamuluhu wuxuu u baahan yahay in uu dadweynaha wax ka ogaysiiyo mashruuca, taasoo ay kamid yihiin siinta xaqiiqooyinka mowduuca ay tahay in laga fikiro si loogu wargaliyo waxyaabaha ku saabsan siyaasadda, dhibaatada, waxyaabaha badalka ah, fursadaha, iyo/ama xalalka. |
| **Daneeyeyaasha Ugu muhiimsan** | Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu wuxuu u baahan doonaa in uu bixiyo liiska daneeyeyaasha ah, ayada oo la doorbidayo in uu ku bixiyo diiwaanka saamilayda ama qaab shaxaysan. Liiska waa in ay kujiraan wax kasta oo ah xiriirada muhiimka ah laga bilaabo wajiga hindisidda kaasoo muhiimad u leh saamynta macmiilka ama bulshada iyo sidaa si lamid ah daneeyeyaasha kasta kuwaas oo danayn fara badan leh iyo/ama saamaynaaya mashruuca.<br><br>CASC waxay u baahan kartaa in Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu ka qayb qaato kulan billoow ah si uu u soo bandhigo macluumaadkaan. CASC waxay la shaqayn doontaa Mulkiilaha Mashruuca ama Maamulaha si loo go'aamiyo waxa Hanaanka Maaraynta Macluumaadka Mashruuca (Project Management Information System) (PMIS) loo isticmaali doono si loo wadaago macluumaadka iyo walaxaha u dhexeeya kooxda mashruuca. |

## TALAABADA LABAAD: Qeex Kooxda Xiriirada Mashruuca

Si loo xaqiijiyo u hogaansamidda Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha (Public Participation Plan), Xeerka VI iyo shuruucda ADA, iyo Wadajirka WMATA (WMATA Compact), waaxo badan oo muhiim ah oo katirsan Metro ayaa kaalin weyn ku yeelan doona qorshaynta xiriirada iyo hanaanka meemarinta.

Ayada oo la isticmaalayo liiska saamilayda uu bixiyo Mulkiilaha Mashruucu ama Maamuluhu in uu yahay barta laga bilaabayo, CASC waxay ku casuumi kartaa xafiisyada kale in ay kusoo biiraan Kooxda Xiriirada Mashruuca ayada oo ay ku xirantahay heerka uu mashruucu gaarsiisan yahay. Waaxaha ku mataansan ee sida caadiga ah kaalinta muuqata ku leh waxaa kamid ah:

- **Xafiiska ADA ee Siyaasadda & Qorshaynta:** Waxa uu mas'uul ka yahay siyaasadda ADA iyo u hogaansamiddeeda. Wuxuu kala taliyaa baahiyaha helitaanka ee dadka naafada ah iyo muwaadiniinta da'da ah, wuxuu u shaqeeyaa in uu yahay xafiiska Guddiga La talinta Helitaanka (Accessibility Advisory Committee), wuxuuna maareeyaa xiriirada shabakadaha gobolada ee diiradda saara arimaha helitaanka.
- **Xafiiska Guddiga Xoghaynta:** Wuxuu mas'uul ka yahay isku duba ridka, dib u eegista iyo qaybinta alaabta Guddiga Metro, diyaarinta dhegaysiga dadweynaha iyo u shaqaynta in uu yahay xafiis uu leeyahay Guddiga Agaasinka ee WMATA iyo Golaha La talinta Gaadiidlayda. Wuxuu kala taliyaa u hogaansamidda Wadajirka (Compact) dhammaan mashruucyada.
- **Xafiiska Cilmibaarista Macmiilka:** Wuxuu mas'uul ka yahay la socoshada tayada iyo tirada cilmibaarista si loo ogaado waxyaabaha uu macmiilku doorbidayo iyo xulashooyinka, wuxuuna bixiyaa dadaalka macmiilka ee go'aanada siyaasadda Metro. Wuxuu ka tala bixiyaa qaababka ugu wanaagsan ee lagu aruurinayo wax ku biirinta dadweynaha iyo falanqaynta natiijooyinka.
- **Xafiiska Fursadda Shaqaalaysiinta Loo simanyahay:** Wuxuu mas'uul ka yahay la socoshada Xeerka VI iyo siyaasadda Qorshaha Kaalmada Luuqadda iyo u hogaansamidda, Wuxuu ka tala bixiyaa u hogaansamidda helitaanka luuqadda iyo baahiyaha tarjumaadda/fasiraadda wuxuuna maareeyaa xiriirka lala leeyahay Ururada bulshada ee gobolada.
- **Xafiiska Xiriirka Dowladda:** Wuxuu mas'uul ka yahay u olaolaynta wuxuuna u shaqqeeyaa in uu yahay xafiis leh siyaasadda federaalka, tan gobolka, iyodeegaanka iyo wakiilo dowladda ka socda.
- **Xafiiska Qorshaynta:** Wuxuu mas'uul ka yahay falanqaynta farsamada ee la xiriirta u hogaansamidda XeerkaVI (Title VI), kaas oo ay kamid yihiin qiimaynta saamaynada Xeerka VI (Title VI) ee adeegga iyo is badalada nooliga. Wuxuu ka tala bixiyaa isticmaalka xogta tirakoobka iyo dadyowga wuxuuna mas'uul ka yahay diyaarinta warbixinada falanqaynta sinaanta.

Xaafiisyada kale ee kujira Waaxda Adeegga Macmiilka, Xiriirada iyo Suuqgaynta waxaa sidoo kale ogaan doona CASC si ay ugu soo biiraan sida loogu baahan yahay. Xubno dheeraad ah oo katirsan kooxda ayaa laga yaabaa in ay u baahdaan in uu u aqoonsado Mulkiilaha Mashruucu ama Maamuluhu maaraynta ilaha (iibka, qaansheegadka, diyaarinta, iyo wixii lamid ah).

Qaabka shaxaysan ee U xilsaaridda Mas'uuliyadaha ama Liiska ayaa qayb ka noqon doona qorshaha xiriirka ugu danbeeya waxaana kamid noqon doona awoodaha mas'uuliyadaha kaalinta e xubin kasta oo kooxda katirsan.





## TALLAABADA SADDEXAAD: Go'aansiga Xiriirada Fariimaha iyo Tabaha

CASC, ayada oo isticmaalaysa dadaalka kooxda xiriirada mashruuca, waxay go'aansan doontaa fariimaha iyo xiriirada ugu habboon, gaarista, iyo tabaha jawaabcelinta ee qorshaha xiriirka. Arinkaan waxaa lagu salayn doonaa macluumaadka mashruuca ee ay wadaagaan Maamulha Mashruuca ama Maamuluhu, kaas oo ay kamid yihiin heerka mashruuca iyo saamayntiisa, wakhtiga loo qorsheeyay, dadka uu saamaynayo/loola dan leeyahay, ahdaafta xiriirada iyo jawaabcelinada, iyo daneeyeyaasha ugu waaweyn.

Qaab shaqo fariimeed oo istiraatiijiyaysan ayaa la samayn doonaa loona isticmaali doonaa in uu noqdo hagaha dhammaan fariimaha gudaha iyo kuwa dibadda ah. Hagahaan fariimuhu wuxuu gacan ka gaysan doonaa soo saarista walxo wadajira oo joogto ah kuwaas oo ka tarjumaya dadka loo danleeyahay ee la ogaaday iyo in uu bixiyo qayb kamid ah waxyaabaha ugu waaweyn ee laga wada hadlayo oo la isla oggolaaday kuwaas oo loo isticmaali doono dhammaan tabaha. Fariimuhu waxay u muuqan doonaan in ay u ekaadaan in la qiimeeyo laguna cusboonaysiiyo heerar kala duwan oo mashruuca ah.

Qorshaha xiriirku waa in uu ka tarjumaa mabaadii'da, ahdaafta' ujeedooyinka' hagaha Metro, iyo natiijooyinka waaweyn ee ka qayb qaadashada dadweynaha (Cutubka 1). Qorshe kasta waa in uu ka fikiraa waxa ay yihiin howlaha iyo tabaha kala duwan ee la isticmaali doono marka bulshooyinka la saameeyay ay noqdaan kuwo ay adag tahay in la gaaro, khaasatan bulshooyinka Xeerka VI (Title VI), si loo xaqiijiyo dadaalo xiriir oo guulaysta.

**Kula kulan dadka meesha ay ku sugan yihiin.**

Marna ha filan in wadeyaasha ama xubnaha kale ee bulshadu ay “noo yimaadaan” si ay noo siiyaan jawaabcelin ama ay wax ka ogaadaan mashruuc kaasoo saamay kara. La xariir oo kasoo aruuriwax ku biirinta meelaha macaamiisha la saameeyay joogaan, hadday tahay boosteejada baskooda, urur deegaanka ah, madalada xarumaha tareemada Metro, ama dabaaldegyada bulshada.

**Isticmaal tiro qaabab ah iyo howlo ah si aad bulshada ugu wargaliso furasadaha ka qaybgalka.**

Tani waxaa kamid noqon kara isku jirka Ururada Bulshada iyo gaarista daneeyeyaasha, warbaahinta la helo (sheekooyinka wararka), calaamadaha la dhajiyo ama calaamadaha gawaarida, xayaysiiska lacagta ah ee ku qoran jaraaidyada luuqadaha badan ku baxa, baraha bulshada ee loo dan leeyahay, soo bandhigyada kulamada gudaha iyo madalada degdega ah. Baahiyaha macaamiisha leh aqoonta hoosaysa, xirfadda luuqaddoodu xaddidan tahay, iyo kuwa naafada ka ah jirka iyo maskaxda ayay tahay in dhammaan la tixgaliyo marka la samaynayo tabaha.

**U isticmaal teknoolojiyadda si habboon.**

Isticmaalka teknoolojiyaddu wuxuu noqon karaa mid faaido aad u weyn leh waana in uu qayb ka noqdaa istaraatiijiyadda ka qayb qaadashada dadweynaha. Muhiimadda tabaha howlaha fogaan aragga ah ayaa la iftiimiyay inta lagu jiro safmarka Covid-19 kaasoo billowday Maarso 2020. Si kastaba ha ahaatee, Metro waa in ay ka feejignaataa ayna isticmaashaa sida ugu habboon aysana ahayn qaabka kaliya ee lagu xiriiro. Isticmaalka teknnoolojiyadda iyo qabaabka kale ee isku jira waxay tixgalinaysaa dhammaan dadweynaha, ayada oo aan u eegayn xaaladda dhaqaalaha ee bulshada. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay in loo tixgaliyo aruurinta jawaabcelinta.



## Shuruudaha Helitaanka iyo U hogaansamidda

Dhammaan qorsheyaasha xiriirada waa in ay kujiraan tabo si loo xaqiijiyo in dhammaan macaamiisha iyo bulshada la saameeyay ay heli karaan macluumaadka ay u baahan yihiin iyo awoodda ay uga qayb qaadanayaan.

### Shuruudaha Qorshaha Kaalmada dhanka Luuqadda

Abuurista qorshe xiriir oo kasta oo mashruucu leeyahay waa in uu u hogaansamaa Qorshaha Kaalmada Luuqadda ee Metro (Metro's Language Assistance Plan) (LAP) kaasoo xaqiijinaya in talaabooyinka mas'uuliyadda ah la qaado si loo bixiyo helitaan micno weyb leh oo ah faaidooyinka, adeegyada, macluumaadka, iyo goobaha kale ee muhiimka ah ee barnaamijyada Metro iyo howlaha loogu tala galay dadka xirfaddooda luuqadda Ingiriisku xaddidan tahya ama aan lahayn. LAP waxay tixgalinaysaa falanqaynta Afarta Qodob ah ee FTA marka ay qiimaynayso luuqadaha loogu baahan yahay xiriirka iyo mashaariicda ka qaybgalka bulshada.

### Falanqaynta Afarta Qodob ah – Qorshaha Kaalmada Luuqadda

Ayada oo lagu salaynayo qodobadaan iyo tiro la ogyahay oo ah dadka leh xirfadda luuqadda Ingiriiska ee xaddidan (LEP/NEP) ee gaadiidka ku leh Metro, luuqadda(daha) la ogaaday waa in si weyn looga fikiraa marka la samaynayo qorshe xiriiro oo cayiman ayada oo la isticmaalayo luuqadda(daha) la door bidayo.

1. Ogaanshaha luuqadda la doorbidayo marka lala falgalayo Metro si loo bixiyo macluumaad iyo adeegyo ku qoran luuqadda gudaha, iyo ku qaybinta macluumaadkaas qaab ku habboon (tusaale la xiriiridda kuwa aan wax akhrin karin).

2. Ogaanshaha inta jeer ee dadka ay xaddidan tahay xirfaddooda luuqadda Ingiriisku (LEP/NEP) ay la kulmaan Metro. Sahanka iyo qiimaynta barnaamijyada iyo adeegyada waaweyn, iyo qodobada waaweyn ee xiriirka si luuqaddooda ay doorbidayaan loogu siiyo helitaan loo siman yahay.

3. Ogaanshaha iyo qiimaynta adeegyada muhiimka ah ee dadweynaha LEP/NEP ah iyo qaababka ugu waxtarka badan ee kula xiriiridda luuqadda la doorbidayo. Ilaalinta wadashaqaynta iyo helitaanka jawaabcelinta ku saabsan adeegya muhiimka ah ee leh/ka imaanaya saaxiibada Metro ee kala duwan, CBO-yada iyo daneeyeyaasha. Ilaalinta wadashaqaynta iyo helitaanka jawaabcelinta ku saabsan waxa ay yihiin adeegyada iyo macluumaadka muhiimka u ah dadka LEP/NEP ee ka imaanaya saaxiibada Metro, Ururada Bulshada, iyo fududaynta kulamada lala yeelanayo dadweynaha LEP/NEP laftooda.

4. Qiimaynta ilaha iyo alaabta gaarista ee diyaarka ah, iyo samaynta macluumaad cusub oo ah mid khusaysa luuqadda gudaha ee loogu tala galaay shakhsiyaadka LEP/NEP. Qiimaynta kharashaadaka alaabta gaarista iyo wadaagidda firfircoon ee macluumaadka gaarista la heli karo taasoo u dhexaysa hay'adda gaadiidka, dadweynaha LEP/NEP ah, kooxaha u dooda, iyo hay'adaha dowladda. Ku shaqaynta xulashooyinka luuqadda gudaha, ayada oo la isticmaalaayo ogaysiisyo ku qoran luuqadda, si loo codsado macluumaad la tarjumay oo dheeraad ah.






**Shuruudaha iyo U hogaansamidda Xeerka Naafada Maraykanka (Americans with Disability Act) (ADA)**

Waa muhiim in la hubiyo in dadka qaba naafanimada dhanka aragga, maqalka, ama hadalka ah ay awoodaan in ay helaan ayna qaadaan macluumaadka, ka qaybqaataan fursadaha jawaabcelinta, ayna ka qayb galaan madalada, si lamid ah sida dadka aan naafada ahayn. Si loo xaqiijiyo u hogaansamidda, qorsheyaasha xiriirada waa in ay tixgaliyaan kuwaan soo socda:

- Dhammaan goobaha madalada ay Metro qabanayso waa in ay ahaadaan kuwo la gaari karo waana in sidaa uu xaqiijiyaa Xafiiska ADA ee Qorshaynta iyo Siyaasadda kahor inta aan goobta la xaqiijin. Goobuhu waa in ay noqdaan kuwo lagu gaari karo gaadiidka dadweynaha waana in sidoo kale loo diyaariyay meelo baabuurta la dhigto oo la heli karo kuwaas oo leh jardiino. Ayada oo ay ku xiran tahay goobta madasha, jardiino ama wiishashka adeegga ayaa loo baahan karaa. Suuliyaashu waa in ay sidoo kale ahaadaan kuwo la heli karo; albaab fureyaasha ayaa la doorbidayaa albaabaduna waa in ay lahaadaan meel banaan oo loogu tala galay furitaanka albaabka oo ADA ku habboon (ugu yaraan 32 inji oo wax celinayaa aysan jirin).
- Shacabka waa in lagu wargaliyaa waxyaabaha ku saabsan talooyinka lagu bixinayo madasha ayada oo la adeegsanayo faafinta warbaahinta, walxaha shaacinta, calaamadaha helitaanka ee la dul dhigo walxaha xayaysiiska, iyo kusoo daridda kooxaha/ururada naafada ee deegaanka liiska xiriirka mashruuca.
- Calaamadaha madasha waa in la dhigaa si ay ka qaybgaleyaasha ugu soo tilmaamaan goobta, qolka, wiishashka, suuliyada, meelaha gawaarida la dhigo, jardiinada ama meelaha lagu tala galay in lagu dago. Macluumaadka tilmaamuhu waa in uu diyaar u ahaadaa dadka indhaha la', ayaga oo ku helaya fariin maqal ah ama kaalmo shaksi ah.
- Kaalmooyinka maqalka iyo adeegyadu waa in ay ahaadaan kuwo diyaar u ah qalab ahaan si ay uga caawiyaan xiriirka dadka qaba naafanimada dhanka wada xiriirka ah.

***Waxaa loogu tala galay dadka indhaha la', aragga lumiya, ama indhaha iyo dhegahaba la':*** Bixiyaan akhriye u qalma, macluumaad qoraal waaweyn ah, Indhoolaha loogu tala galay, ama si elektoroonig ah loogu isticmaalo barnaamijka akhrinta shaashadda ee kombuyuutarka, ama duubis maqal ah ama macluumaad qoran. Macluumaadka la soo dhigo ama lagu wadaago si onleen/elektoroonig ah waa in uu ahaadaa mid la heli karo.

***Dadka dhegaha la' ama maqalka lumiya, ama dhegaha iyo indhahaba la':*** Sii qalabka maqalka caawiya, qoraal sameeye xirfad u leh, tarjumaan luuqadda dhegooleyaasha ah, tarjumaan afka ah, tarjumaanka luuqad jireedka dhegooleyaasha, tarjumaanka luuqadda ay kuwada hadlaan dadka dhegaha iyo indhahaba la', qabashada wakhtiga saxda ah, walxaha qoran, ama qoraal daabacan oo ah hadalka kaydsan (sida saacada matxafka ama guriga taariikhda).

***Dadka qaba naafanimada dhanka hadalka ah:*** Sii tarjumaan hadal-ka-hadal ah oo xirfad leh (qof loo tababaray in uu aqoonsado hadalka aan fasiixa ahayn si fasiix ahna uu ugu celiyo), ka dhigo qalinka iyo warqadda in ay ahaadaan qalab wax caawinaya si ay si waxtar leh ugu hadlaan.

## TALLAABADA AFARAAD: Samee Shuruudaha Ilaha

Qorshr kasta oo xiriir oo la dajiyay waxa uu u baahan doonaa miisaaniyad iyo ilo shaqaale. Ayada oo qayb ka ah hanaanka qorshaynta, CASC, ayada oo la jirta Mulkiilaha Mashruuca ama Maamulaha iyo kooxda mashruuca, waxay aqoonsan doontaa ilaha loo baahan yahay ayada oo lagu salaynayo howlaha iyo tabaha muhiimka ah:

- ***Qorshuhu ma u baahan yahay shaqaale  iyo ilo banaanka ah?*** Mulkiileyaasha Mashruuca ama Maamuleyaashu waa in ay citiqaadaan in mashaariicda intaooda badan u baahan yihiin ilo banaanka ah. Dadka leh xirfadaha gaarka ah, sida diyaarinta khariiradda iyo macluumaadka sawirada, duubsita iyo hagaajinta muuqaalada, adeegyada tarjumaadda/fasiraadda, qorshaynta madasha, gaarsiinta luuqadaha badan, adeegyadarakibaadda, iyo wixii lamid ah ayaa loo baahan karaa in la helo ayada oo ay barbar socoto soo iibsiga alaabta iyo qalabka. Ayada oo ay ku xiran tahay baaxadda heerka mashruuca, waxaa la go'aamin karaa in badnida shaqaalaha loo baahan yahay.
- ***Yaa mas'iil ka ah helitaanka iyo maaraynta ilaha la helay?*** Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu wuxuu la shaqayn doonaa CASC si loo go'aamiyo qaababka ugu wanaagsan ee lagu heli karo ilahaan, ayada oo sida ugu macquulsan ay tahay xiriiro iyo qandaraasyo jira. Kaalimo iyo mas'uuliyado ayaa la samayn doonaa laguna dari doonaa Shaxda Shaqada Mas'uuliyadda ama Liiska waxayna u baahan kartaa shaqooyin iib oo ay tahay in uu dhammaystiro Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu.
- ***Waxa lagu saleeyay kharashku ma yahay mid ka tarjumaya baahiyaha ilaha?*** Haddii CASC aysan qayb ka ahayn saa saaristii hore ee miisaaniyadda xiriirada, waxa lagu saleeyay kharashka waxay u baahan yihiin in dib wax looga badalo ayada oo ay ku xiran tahay baahiyaha ilaha la soo ogaaday. Maalgalinta macluumaadka ilaha, oo ay kamid yihiin hanaanka la doorbidaayo ee aqbalaadda kharashka, samaynta qaansheegadka, iyo wixii lamid ah waa in uu qoraa uuna xaqiijiyaa Mulkiilaha Mashruucu ama Maamuluhu. Wax kasta oo caqabad ah oo ku wareegsan miisaaniyadda waa in si degdeg ah loo wadaagaa waxayna saamayn kartaa qorshaha iyo/ama wakhtiga loogu tala galay.

Helitaanka iyo hanashada ilaha ayaa sida caadigaa ah saameeyaha ugu weyn ee wakhtiga loogu tala galay mashruuca. Haddii aysan jirin qorshayn aan ku habboonayn, qaybtaanu waxay saamayn balaaran ku yeelan kartaa u hogaansamidda iyo jadwalka mashruuca.

## TALLAABADA SHANAAD: Samee Jadwal

Jadwalka meelmarinta qorshaha xiriirada ayaa waxaa samayn doona CASC ayada oo la jirta kooxda xiriirada mashruuca. Jadwalku wuxuu ku tala galayaa wax ku biirinada soo socda:

- Liiska talaabooyinka waaweyn iyo wakhtiga loo qorsheeyay/fulinada uu bixinayo Mulkiilaha Mashruucu ama Maamuluhu
- Liiska howlaha iyo xeeladaha lagu qeexay qorshaha xairiirada, kaasoo lajira muddada la qiyaasayo
- Helitaanka ilaha gudaha, ayada oo la tixgalinayo mashaariicda soo laalaabata ama soo socota, jadwalada fasaxyada iyo dalxiisyada
- Helitaanka ilaha banaanka ah, ayada oo la tixgalinayo qandaraas bixinta muddada uu soconayo iyo waxyaabaha kale ee muhiimka ah

Howlahaan waa la isku xijin karaa si qaab jadwal ah loogu sameeyo kaasoo wata taariikhaha loo qorsheeyay dhammaystirka howlaha mashruuca. Isbadel kasta oo lagu sameeyo dhabaha muhiimka ah wuxuu caqabado ku noqon karaa jadwalka guud.

Khataraha ayaa sidoo kale u baahan in la tixgaliyo inta lagu jiro samaynta jadwalka. Kuwaan waxaa kamid noqon kara khataraha gudaha ah sida amarada maamulka, ama khataraha banaanka sida bixiyeyaasha ama dib u dhigista qandaraasyada.

Marka qorshaha xiriirada la qoro, waxaa dib u eegi doona kooxda mashruuca iyo saamilayda muhiimka ah si ay u meelmariyaan. Ayada oo ay ku xirantahay adkaanta qorshaha iyo ilaha la helayo, waxay qaadan kartaa ilaa bil samaynta qorshaha iyo meelmarinta si horey loogu socdo.



Hindisidda Mashruuca

Hormarinta Qorshaha Xiriirada

**Fulinta Qorshaha Xiriirada**

La socoshada, Dabagalka iyo Ka warbixinta

Marka la gabagabeeyo lana meelmariyo, CASC iyo kooxda xiriirada mashruuca ayaa bilaabi doona in ay fuliyaan qorshaha xiriirada. Qodobo badan ayaa ka qaybqaadan doona meelmarinta oo lagu guulaysto.

- ***Xiriir cad oo joogto ah oo u dhexeeya Mulkiilaha Mashruuca ama Maamulaha iyo CASC ayaa lagama maarmaan u ah guusha mashruuca.*** Tani waxaa kamid ah in si dhakhso ah loo gudbiyo wax kasta oo wax ka badal ah oo lagu sameeyo mashruuca kuwaas oo khuseeya heerka shaqada ama jadwalka iyo bixinta macluumaadkii ugu danbeeyay oo joogtada ah. CASC waxay codsan kartaa in Mulkiilaha Mashruuca ama Maamuluhu uu qabto kulamo ku saabsan macluumaadkii ugu danbeeyay ee mashruuca ah ama uu bixiyo macluumaadkii ugu danbeeyay dhammaan mashruuca.
- ***Xaqiiji in qof walba uu fahmo saamaynada wakhtiyada la qorsheeyay oo lagu guuldarraysto ku yeelan karto mashruuca iyo masiirka mashruuca.*** Si mashruucu u guulaysto, dhammaan xubnaha kooxda xiriirada mashruucu waa in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan in ay waxyaabaha ku keenaan wakhtigii loogu tala galay. Dib u dhac hal ama laba maalmood ah waxa uu dhibaatooyin u keeni karaa dhabaha lagama maarmaanka ah ee mashruuca.
- ***Wax ka badalo kasta oo lagu sameeyo qorshaha xiriirka ee la aqbalay, kaasoo ay kujiraan kharashka lagu salaynayo iyo liiska ilaha, waxay u baahan yihiin in lagu sameeyo hanaan isbadel oo la maamulayo.*** Tani waxay la micno tahay in wax ka badaladaan ay u baahan yihiin in CASC ay falanqayso ayna meelmariso saamilayda muhiimka ahna la ogaado kahor inta aan la fulin.
- ***Mashaariicda muddada dheer ee sii jira bilaha ama sanadaha badan waxay u baahan doonaan in dib loo qiimeeyo tabaha xiriirada iyo fariimaha si joogto ah ama hadba sidii arin usoo kororto.*** Qiimaynta socota ee daneeyeyaasha iyo qanaacada bulshada waa laga wada shaqeeyaa.

Metro waxay sidoo kale u baahan tahay macluumaadkii ugu danbeeyay oo joogto ah oo ku saabsan xaaladda mashaariicda banaanka laga hagayo saamaynayana macaamiisha Metro si loo xaqiijiyo in qorshaha xiriirka loo fuliyo sida loo ansixiyay.



Si loo xaqiijiyo u hogaansamidda loona ogolaado hormar socda iyo qiimayn, dhammaan qorsheyaasha xiriirada ay la socoto ayna dabagasho CASC ayada oo qayb ka ah qaabka shaqada talaabooyinka howlaha loo isticmaalayo ka warbixinta mashaariicda gaargaarka ah iyo u hogaansamidda Xeerka VI (Title VI). Xogta talaabooyinka howlaha waxaa lagu aruurinayaa afar talaabo oo warbixin oo kala duwan:

### 1 *Qorsheyaasha Xiriirada*

Howlo iyo taba fara badan oo lagu qoray qorshaha xiriirka, oo ay kujiraan goobaha madalada, helitaanka luuqadda, iyo helitaanka ADA, ayaa lala soconayaa waxaana si toos ah loo siinayaa qaabka shaqada talaabooyinka howlaha.

### 2 *Dulmarrada Howlaha ka Danbeeya*

Dulmar ku saabsan howl kasta oo gaaris ah ama xeel ah ayaa la qorayaa si loogu daro macluumaadka soo socda marka ay ku habboon tahay:

- Ujeeddada nooca howsha. Maxay tahay sababta howshaan/ xeeladdaan loo doortay?
- Ka qayb qaadashada ama la falgalka la qiyaasayo/saxda ah. Kuwaan waxaa kamid noqon kara tiro sahamo ah oo la aruuriyay, alaab la qaybiyay, iimaylo la diray, ama tiro ka qaybgaleyaal ama xaadirayaal ah, ayada oo ay ku xiran tahay nooca howsha.
- Dadyowga dadwynaha loo danleeyahay. sida dadka laga tirada badan yahay, kuwa dakhligoodu hooseeyo, LEP iyo wixii lamid ah.
- Suuqgaynta/xayaysiinta. Waxa ay yihiin tabaha warbaahinta ee la isticmaalay, halka alaabta la dhigay, iyo waxa ay tahay luuqadda loo tixgaliyay howshaan?
- Natiijada howsha. Ujeeddadii ma guulaysatay?
- Casharada laga bartay nooca howsha ama xeeladda.
- Haddii ay khusayso, qiimaynta ama kala saraynta ayada oo lagu salaynayo sahamada, foomamka jawaabcelinada ama qiimaynta.*

### 3 *Qiimaynta Mashruuca Ka danbaysa*

Dhammaan dulmarada howlaha gaarista waxaa la isugu geeyaa qiimay mashruuca ka danbaysa dhammaadka mashruuc kasta.

### 4 *Dib u eegista Cabirada Howlaha PPP ee saddex sanadlaha ah*

Natiijooyinka qiimeynada mashruuca ka danbeeya sanadka oo dhan waxaa loo geeyaa dib u eegista cabirada howlaha ee sanadlaha ah. Natiijooyinka waxaa la isugu geeyaa warbixin saddex sanadle ah waxaana loo wadaaga ayada oo qayb ka ah qorshahaan ka qaybqaadashada dadweynaha (Public Participation Plan, PPP) (Cutubka 3).

Hanaanka Maaraynta Ka qayb qaadashada Dadweynaha (Public Participation Management System) (PPMS) waa qalab gudaha laga sameeyay kaasoo CASC ay isticmaasho si ay ula socoto una daba gasho horumarka qorshaha xiriirka. Hanaankaan wuxuu siinayaa daahfurnaan maamuleyaasha mashaariicda si ay ula socdaan horusocodka mashruucooda waxaana kujira qaybo loogu tala galay ku daridda dhammaan talaabooyinka warbixinta howlaha. Qalabkaan wuxuu sidoo kale bixinayaa awoodda lagu qiimeeyo in hadafkii la gaaray iyo in kale.

Qorshaha xiriiradu waxaa kamid noqon doona warbixin kasta oo xiriir oo dheeraad ah taasoo u baahan in la abuuro, hadday tahay codsi ka yimaada daneeyeyaasha ugu muhiimsan ama ay u baahan yihiin sharciyada federaalka.

Qorshaha xiriirada waxa uu sidoo kale go'aamin doonaa marka mashruuca la xirayo marka la eego dhanka xiriirada. Tani waxay noqon kartaa marka dhammaan warbixinada la gudbiyo wax ku biirintii ugu danbaysayna dib loogu wargaliyo daneeyeyaasha ama bulshada, ama marka saamayn aysan jirin qalxaha ogaysiisyaduna ay u baahan yihiin in la qoro.

** Marka ay khusayso, ka qaybqaateyaasha howlaha gaarista waa in ay awoodaan in ay qiimeeyaan khibraddooda ayna Metro siiyaan fursad ay kusoo aruuriso macluumaad ku saabsan dadyowga oo muhiim ah kaas oo loogu tala galay ujeeddooyinka Xeerka VI (Title VI). Xog aruurinta, jawaab celinada, ama foomamka qiimaynta waa in ay buuxiyaan kaarka faalada Xeerka VI (Title VI) ee caadiga ah ayna fursad siiyaan ka qayb qaateyaasha si ay u bixiyaan wax ku biiri dheeraad ah oo ku saabsan mowduuca markaa gacanta lagu hayo ayna uga talo bixiyaan sare u qaadidda howlaha gaarista ee mustaqbalka.*

Hindisidda Mashruuca

Hormarinta Qorshaha Xiriirada

Fulinta Qorshaha Xiriirada

**La socoshada, Dabagalka iyo Ka warbixinta**




Illaa intii ay Metro soo saartay Qorsheheeda Ka qayb qaadashada dadweynaha (Public Participation Plan, PPP) asaga oo qayb ka ah Xeerka VI (Title VI) ee saddex sanadlaha ah ee 2014-2017, Maamulku waxay ka shaqeeyeen in ay noqoto hogaamiyaha howlaha ka qayb qaadashada dadweynaha ee gaadiidka. Waxa aad usii muhiim ah, in badan oo kamid ah mashaariicda iyo siyaasadaha ay Metro sare u qaadday ilaa iyo intii ay meelmarisay PPP waxay faaido u yeesheen jawaabcelinta laga helay xubnaha bulshada.

Metro waxay koror weyn ka samaysay hindisooyinka mashruuca iyo siyaasadaha saddexdii sano ee la soo dhaafay, si gaar ah shaqada caasumadda, dhismaha, adeegga iyo nooliga. Cutubkaan waxa uu iftiiminayaa shaqada muuqata ee laga sameeyay xiriirka iyo la falgalidda bulshada, kaasoo ay kamid yihiin qaabka loogu tala galay in lagu taageero dadaaladaan.

## Iftiiminta Mashruuca

Kooxda ka qaybqaadashada Bulshada ee Metro waxay maareeyeen xiriirada iyo gaarista wax ka badan 60 mashruuc intii u dhexaysay Janaayo 2018 illaa Maarso 2020. Hoos waxaa kujira dulmarka labo mashruuc kuwaas oo isticmaalay farsamooyin xiriiro iyo ka qayb qaadasho oo cusub. Liis dhammaystiran oo ah mashaariicda ayaa laga heli kara *Lifaaqa D: Liiska Howlaha Gaarista*.




### Xisaab Sanadeedka 2021 Miisaaniyadda

Jiilaal kasta, Metro waxay dhammaystirtaa hanaan wax ku biirin oo weyn oo loogu tala galay miisaaniyadda xisaab sanadeedka soo socda. Miisaaniyadda la soo diyaariyay ee loogu tala galay Xisaab Sanadeedka 2021 ayaa la soo saaray si sare loogu qaado khibradda macmiilka iyo xulashooyinka nooliga, iyo maaraynta kharashka. Waxaa kujiray 11 wax ka badal nooliga ah oo la soo jeediyay iyo todobo nooc oo ah wax ja badalada adeegga oo la soo jeediyay.

Qorshaha xiriirada waxaa kujira tabaha caadiga ah sida madalada gaarista ee xarumaha, xarumaha gaadiidka iyo boosteejooyinka basaska, howlaha daneeyeyaasha, suuqgaynta loo danleeyahay iyo warbaahinta la helay, guryaha furan, iyo Dhegaysiga Dadweynaha ee Compact. Si kastaba ha ahaatee, ayada oo ay sabab u tahay baaxadda iyo tirada soo jeedinada, waxaa la go'aamiyay in qalab cusub iyo farsamooyin loo baahdo si loo kordhiyo fahamka macmiilka loona hubiyo in jawaabo badan oo wax dhisaya loo helo.

- Si dhammaan soojeedinada loogu daboolo si sax ah kuwaas oo qayb ka ahaa miisaaniyadda (18 nooc, oo ah wadar ahaan 100 soojeedino kala duwan ah), qalab sahan oo oonleen ah ayaa loo isticmaalay in lagu aruuriyo jawaabcelinta. Sahanka, inkasta oo la yareeyay, wuxuu u baahnaa ugu yaraan shan illaa 10 daqiiqo si loo dhammaystiro ayada oo ay ku xiran tahay waxa uu yahay soojeedinta macmiilku doortay si loo bixiyo jawaabcelinta. Maaddaama abuurista sahan waraaq ah uusan ahayn xulasho ayada oo ay sabab u tahay baaxadda soojeedinta, qalab cusub ayaa loo sameeyay gaarista kooxaha waddooyinka si loo dhiirigaliyo ka qayb qaadashada oonleenka ah.

- **In kabadan 106,440 oo macluumaad ah ayaa waxaa qaybiyay kooxaha waddooyinka inta lagu jiro muddada faalada bulshada.** Macluumaadka, kaasoo ay kujiraan luuqadaha Ingiriiska iyo Spanish-ka iyo warbixin ku qoran Amxaari, Shiinees, Faransiis, Kuuriyaan, iyo Vietnamese kuwaas oo ku saabsan sida loo helo macluumaadka luuqadda ay doorbidayaan, oo ay kujiraan koodhka QR loogu tala galay macaamiisha si ay u scan-gareeyaan si iskood ahna u tagaan sahanka ka imaanaya qalabkooda teleefoonka gacanta. Alaabta waxaa sidoo kale lagu xayaysiinayaa sasabid si loo qaato sahanka kaasoo ah fursad aad ugu guulaysan karto kaar $50 SmarTrip® ah.

- Kooxaha gaarista ee luuqadaha badan waxay wataan tablet-yo inta lagu jiro dhacdada gaarista. Macaamiisha danaynaysay waxay sahanka ku qaadan kareen isla goobta, laakiin kuwa aan wakhti u haysan waxay si dhakhso ah u bixin kareen macluumaad xiriir waxayna heli kareen link sahanka oo loo soo diray si toos iimaylka ama qoraal ahaan asaga oo Ingiriis iyo Isbaanish ah.

- Wakhtigii ugu horeeyay waligeed, xisaabiye soojeedinta nooliga ah ayaa waxaa sameeyay shaqaalaha Metro. Asaga oo ku diyaars an Ingiriis iyo Isbaanish, qalabku wuxuu macmiilka u ogolaaday in uu safar galo si uu u xisaabiyo nooliga laga rabi karo marka la barbar dhigo nooligooda hadda. Soojeedinada nooliga ee kala duwan waxaa lagu baabi'in karaa daminta iyo daarista, qalabkuna wuxuu iftiimiyay kuwa ay yihiin wax soo saarada gudbidda ka kaalmayn kara in macmiilka lacag u baaqato. Lifaaqyada xisaabiyaha ayaa diyaar ku ahaa webseetka iyo tablet-yada kooxda gaarista. Waxaa jiray in ka badan 2,500 oo bookhashooyin ah oo la soo bookhday xisaabiyeyaasha kuwaas oo ka imaanayay wax ka badan 2,200 oo ah bookhadeyaal khaas ah.

Dadaaladaanu waxay Metro ka caawiyeen in ay u soo aruursato in ka badan 17,000 jawaabood miisaaniyadda, ayada oo 93% ee wax ku biirinta laga helay sahanka.

## Route 79 *MetroExtra* Tijaabada Bilaa Lacagta




Si loo tijaabiyo saamaynada howlaha iyo macmiilka ee ciribtirka isu diridda lacagaha ee basaska, baahin sanad soconaysa oo ah gaari korista bilaa lacagta ah ee Route 79 *MetroExtra* ayaa la bilaabay Juun 2018. Waddada waxaa baahinta loogu doortay tiro sababo ah awgood, khaasatan qaabka, tirada inta jeer iyo helitaanka SmarTrip® iibsiga iyo furista xulshooyinka la socda iridaha.

Ujeeddada baahintu waxay ahayd in la qiimeeyo in faaidooyinka la filayo lagu gaari karo ayada oo la isticmaalayo xaaladaha shaqada ee dunida dhabta ah. Tani waxaa kujiray in macaamiishu jeclaan doonaan baahinta tijaabada ah, in ay kusoo rogi lahayd culays weyn ama shaqaalaha, iyo in gaari korista bilaa lacagta ah ay dhibaatooyin dhanka shaqadaha ah kusoo rogi karto ama sare u qaadi karto howlaha adeegga.

Shaqaaluhu waxay isticmaaleen xeelado cusub ayada oo qayb ka ah qorshaha xiriirada si wax loo baro macaamiisha ayna aruuriyaan wax ku biirinta loo baahan yahay cabirada howlaha:

- Shaqaalaha baska waxaa laga sahmiyay khibraddooda ay u leeyihiin baahinta tijaabada ah. Faalooyinkoodu waxay sheegeen in macaamiishu ay ku wareereen erey bixinta "bilaa lacagta ah" ("cash-free") ayaka oo u malaynaya in micnaheedu yahay nooligu bilaash yahay, taasoo lagu wargalin doono xiriirada mustaqbalka iyo go'aanada fariimaha gaarista.
- Si loo xaqiijiyo saamaynta baahinta tijaabada ah ay ku yeelan kartofahanka iyo hab dhaqanka macmiilka, sahamo waddooyinka ah ayaa laga sameeyay Route 70 and Route 79 *MetroExtra* deegaanka ah saddex billood oo ka horeysay tijaabada waxaana lasoo aruuriyay 1,200 jawaabood. Badalkii muunaddii qancinta ee caadiga ahayd, qorshe muunad ah oo adag ayaa laga fikiray si loo xaqiijiyo muunad u taagan oo ah wadeyaasha Metrobus ee maalmaha todobaadka taasoo laga sameeyay waddooyinka 70 iyo 79 iyo si fiican u fahmidda sida macmiilka "dhexdhexaadka ah" ay siyaasaddu u saamaysay. Natiijooyinku waxay muujiyeen in wadeyaashu ay taageerayeen tijaabada ayna ka arkayeen horumar ka shaqaynteeda iyo wakhtiga sugitaanka. Wadeyaashu waxay sheegeen in baahinta tijaabada ah ay ku hagtay in ay badelaan dhaqamadooda furista kaarka SmarTrip®.

- Kahor bilaabidda tijaabada, koox gaaris ah oo luuqado badan ku hadlaysa ayaa aaday boosteeyooyinka basaska ee waaweyn si ay ugu wargaliyaan macaamiisha waxyaabaha ku saabsan baahinta tijaabada ah. Kooxaha diiradda saaraya waxbaridda macaamiisha ee ku saabsan qaababka kala duwan ee ay ku dib ugu galin karaan kaarkakooda SmarTrip®, iyo sidaa si lamid ah faa'idooyinka istiicmaalka badelkii ay bixin lahaayeen lacag caddaan ah. Qiyaas ahaantii 10,000 oo macluumaad ah kaasoo ay kujireen iibsashada SmarTrip® iyo goobaha laga gashado ayaa waddada oo dhan laga qaybiyay.

Metro ugu danbayn waxay samaysay go'aan ah in aysan meelmarin siyaasad bilaa lacag caddaan ah oo joogto ah. Si kastaba ha ahaatee, dadaaladaan waxay bixiyeen tilmaamo dheeraad ah kuwaas oo wargalinaya wadaxaajoodyada mustaqbalka ku saabsan siyaasadaha nooliga ee baska.

## Mashaariicda Kale ee Muhiimadda leh in La ogaado:

- Qorshaha xiriirada Madasha Sare u qaadidda Mashruuca waxaa laga fidiyay qorsheyaasha xirista ee hore waxaana kujiray qorsheeyaha badalo safar oo la diyaariyaya oo onleen ah, qoraal mashruuc ah, iyo macluumaadkii ugu danbeeyay ee dhismaha oo laba todobaadle ah. Kooxdu waxay sidoo kale si guul ah u tijaabisay isticmaalka Nextdoor (shabakad baraha bulshada ah ee gudaha laga leeyahay) si loo bartilmaameedsado bulshooyinka ay saamaynayso ee leh xiriirada khuseeya.
- Qorshaha xiriirada mashruuca West Hyattsville Concrete & Pavement Repair wuxuu diiradda saaray kubixinta macluumaadka luuqadda gudaha ayada oo ay sabab u tahay boqoleyda faraha badan ee macaamiisha xirfaddooda luuqadda Ingiriisku xaddidan tahay ee xarunta imaanaya. Ayada oo ay sabab u tahay arinkaanu, dhammaan xubnaha gaaristu waxay ahaayeen kuwo isku fasiraya Isbaanish, ayaga oo ugu danbays sameeyay 2,300 oo falgalo ah oo ku qoran Isbaanish lix jeer.
- Mashruuca Gaadiidka Basku waxa uu dhisay qorshe xiriir oo loo dhan yahay oo gobolka ah, kaasoo ay kujireen isku darka kooxda iyo kulamada guddiga ay la yeelanayaan daneeyeyaasha, madaalada degdega ah iyo guryaha u furan bulshada, iyo kooxaha diiradda saara shaqaalaha basaska si ay u bixiyaan istiraatiijiyad jawaabcelin ku saabsan Istiraatiijiyad iyo Qorshe Howleed loogu tala galay tobanka sano ee soo socota. Laba sahan oo dadweyne ayaa soo aruurisay wax ka badan 8,800 jawaabood.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashaariicdaan si aad u hesho nuqul kamid ah Xiriir Bulsho oo kasta & Warbixinta Dadaalada, la xiriir Xafiiska Macluumaadka & Xiriirka Istiraatiijiyadaysan (Office of Content & Strategic Communication).



Metro waxay isticmaashaa qalab dabagal oo websayt ah kaasoo si gaar ah loogu sameeyay hanaankeena qorshaynta xiriirada oo loogu yeero Hanaanka Maaraynta Ka qaybqaadashada Dadweynaha (Public Participation Management System) (PPMS). Qalabkaanu wuxuu siinayaa hab cusub oo loola socdo ka qaybqaadashada dadweynaha ee mashruuca la qorsheeyay wuxuuna abuurayaa hal xarun oo xogta lagu hayo sidii si fudud looga warbixin lahaa. PPMS waa middii ugu horeysay ee nooceeda ah ee laaga fikiro dabagalka ka qayb qaadashada dadweynaha gaadiidka.

Hanaanka Maaraynta Ka qayb qaadasahada Dadweynaha waxay isticmaaleyaasheeda siisaa hanaan websayt ku dhisan kaasoo dukumiintiyada qorsheeyeyaasha xiriirada loogu tala galay nashruuca waax kasta, uu qaado xog ku saabsan natiijooyinka howlaha gaarista, soona saaro warbixinta sanadlaha ah ee Hay'adda Gaadiidka Federaalka (Federal Transportation Administration) (FTA)  ee ku saabsan howlaha ka qayb qaadashada bulshada, ee laga arko *Qoraalka D: Liiska Howlaha Gaarista*. Shaqada muhiimka ah ee la xiriirta ee PPMS waa Kalaandarka Madalada Dadweynaha, kaasoo bixinaya dulmar dhexe oo ah madalada dadweynaha ee khuseeya iyo sidaa si lamid ah howlaha gaarista bulshada. PPMS waxaa loo dhisay in ay ka bixiso isla xisaabtan maamuleyaasha iyo Xafiiska Macluumaadka & Xiriirada Istiraatiijiyadaysan si ay u bixiyaan macluumaad ku saabsan mashruuca iyo la socoshada horu socodka. Waxay diyaar u tahay dhammaan isticmaaleyaasha gudaha ee Metro ayada oo la adeegsanayo intranet, Metroweb, Maamulku leeyahay.

Mid kaimid ah shaqada ugu muhiimsan ee PPMS ayaa ah awoodda loola soconayo cabirada howlaha. Sida lagu sharaxay Cutubka 2 aad ee kujira La socoshada, Dabagalka iyo Ka warbixinta, waxaa jiray cabiro ka warbixin oo badan kuwaas oo laga hago PPMS dhexdeeda, waxaana kamid ah qorsheyaasha xiriirada, dulmarada howlaha ka danbeeya, iyo qiimaynada masharuuca ka danbaysa. Hoos waxaa ku jira Dib u eegista Cabirada Howlaha PPP ee saddex sanadlaha ah kuwaas oo ku salaysan dadaalada la dhammaystiray Janaayo 2018 – Maarso 2020 (ka hor cudurka safmarka ah).



# Hanaanka Maaraynta Ka qaynqaadashada Bulshada iyo Warbixinta Cabirada Shaqada PPP ee Saddex sanadlaha ah

| Istiraatiijiyadda | Shaqada | Tallaabooyinka Howlaha, Yoolka iyo Ilaha |
|---|---|---|
| **1. QAABABKA IYO MACLUUMAADKA** | | |
| Waa maxay tallaabooyinka aad qaaday si aad u gaarto dadweynaha mashruuca (LEP, kooxaha dakhligoodu hooseeyo iyo kuwa laga tirada badan yahay)? | Dhacdooyinka gaaristu waakuwo muuqal ahaan ay u heli karaan ka qayb qaatayaashu. | 1. **100%** howlaha gaarista waxa ay u jireen ¼ mayl laynka Metrobus ama Metrorail. |
| | | 2. **100%** oo ah goobaha loogu tala galay howlaha gaarista waxaa aqbalay shaqaalaha WMATA ADA. |
| | Macluumaadka howsha, waxaa kujira suuqgaynta iyo alaabaha xayaysiiska, ay yihiin kuwo ay ka qaybqaateyaashu heli karaan. | 3. **99.95%** oo ah waxyaabaha gaarista waxaa loo tarjumay dhammaan luuqadaha waaweyn lagu ogaaday Qorshaha Gaarista iyo Xiriirada Mashruuca. |
| | | 4. **45.68%** oo ah howlaha waxaa looga faa'idaystay warbaahin luuqado badan si loo xayaysiiyo macluumaadka howsha. |
| | | 5. **97.34%** oo ah alaabta gaarista waxaa la sameeyay ugu yaraan laba todobaad kahor madasha. |
| **2. JAWAAB CELINTA KA QAYBQAADASHADA IYO MADASHA** | | |
| baaxadda ka qayb qaadashadu ma waafaqsan tahay mashruuca dadyowga? Bulshada iyo shaqaaluhu ma u arkeen gaarista mid waxtar leh? | Marka laga tago kulamada loo diyaariyay kooxaha yaryarka ah, madalada gaarsiinta mashruucu waa in ay ahaadaan kuwo si wanaagsan looga soo qayb galay. | 6. **97.95%** oo ah howlaha gaarsiinta kuwaas oo buuxiyay hadafkii ka qayb galka madasha noocaas ah. |
| | Ka qayb qaadashada dadweynaha kamidka ah LEP, iyo kuwa dakhligoodu hooseeyo ee gaarsiinta kuwo si sax ah uga tarjumaya dadweynaha mashruuca. | 7. **99.59%** oo ah baaxadda ka qayb qaadashada dadka laga tirada badan yahay iyo kooxaha dakhligoodu hooseeyo ee kujira howsha gaarsiinta waxa ay buuxiyeen ama ka bateen heerka dadyowga ee dadweynaha mashruuca ee lagu ogaaday Qorshaha Gaarsiinta iyo Xiriirada Mashruuca. |
| | Ka qaybqaateyaasha madasha gaarsiintu waxay lahayeen khibrad wanaagsan waxa ayna ku qanceen fursada ah in ay bixiyaan wax ku biirin. | 8. **100%** oo ah howlaha gaarsiintu waxay heleen celcelis ah "wanaagsan" ama qiimayn kasii sareysa oo ka timid kaarka faalada ee madasha kaddib ama sahan lagu sameeyay howl kasta oo mashruucu leeyahay. |
| | Casharada ugu waaweyn ee laga bartay hanaanka gaarsiinta. | 9. **75.65%** oo ah howlaha gaarsiinta maamuleyaasha mashruucu waxay soo koobeen casharada ugu waaweyn ee laga baratay gaarsiinta mustaqbalka. |
| **3. LA SOCOSHADA** | | |
| Siinta fursad cad dhammaan ka qayb qaateyaasha gaarsiinta dadweynaha in ay helaan macluumaad la socodsiin ah oo ku saabsan mashruuca, kuwaas oo ay kujiraan tallooyin iyo qorsheyaasha meelmarinta. | Dhammaan ka qaybqaateyaasha gaarsiinta madasha waxaa lagu wargalinayaa natiijooyinka madasha, natiijooyinka mashruuca iyo meelmarinta natiijooyinka mahruuca. | 10. **100%** howlaha gaarsiinta maamulaha mashruucu waxa uu soo koobay tallooyinka ugu muhiimsan ee ka imaanaya bulshada wuxuuna sharaxay sababta ama sababta aan arinkaan loo meelmarin karin. |
| | | 11. **100%** howlaha gaarsiinta maamulaha mashruucu wuxuu soo koobay talooyinka ugu muhiimsan ee ka imaanaya bulshada waxa uuna sharaxay sababta ama sababta aan arinkaan loo meelmarin karin. |
| | | 12. **91.48%** oo ah howlaha gaarsiinta waxay kujireen hanaan diyaarsan oo loogu tala galay la socoshada ka qayb qaateyaasha gaarsiinta iyo daneeyeyaasha/CBO-yada muddo u dhexaysa qorshaynta iyo meelmarinta mashruuca. |
| | | 13. **99.06%** oo ah howlaha gaarsiinta waxaa jira hanaan cad oo loogu tala galay dib u ogaysiinta bulshada (ay kujiraan kooxha dayowga ugu muhiimsan ee ka socda mashruuca) marka waxyaabaha mashruuca la meelmariyo. |



Ka soo aruurinta jawaabaha macaamiisha iyo xubnaha bulshada si balaaran waxay awood u siinaysaa in Metro ay si wanaagsan ugu adeegto gaadiidleydeeda. Xafiiska Cilmibaarista Macmiilku wuxuu ka shaqaynayaa mashaariic badan asaga oo soo aruurinaya wax ku biirino la iftiimiyay si loo sameeyo go'aano shaqo oo wanaagsan. Qaar kamid ah mashaariicdaan waxaa kamid ah:

- Samaynta sahamada raaligalinta macmiilka ee rubuc laha ah ee macaamiisha Metro si loo cabiro guusha kajirta halbeegyo dabagal oo kala duwan.
- Samaynta wareysiyo waji-ka-waji ah oo lala yeesho macaamiisha dakhligoodu hooseeyo si loosoo aruuriyo jawaabcelinta ka imaanaysa wax soo saarada nooliga loo soo jeediyay dadka dakhligoodu hooseeyo, baridda go'aanada gudaha ee khuseeya isticmaalka iyo ka faaidaysiga meelmarinta dalabyada nooliga.
- Samaynta koox diiradda saarta ee khusaysa qaabka iyo muuqaalka Metrobuses-ka cusub, oo ay kamidka yihiin isticmaalka basaska cusub ee loogu tala galay macaamiisha hadda ee MetroAccess ayada oo la isticmaalayo adeegyo wareega.
- Samaynta kooxo diiradda saara oo oonleen ah iyo sahamo onleen ah oo lagu sameeyo macaamiisha Metrorail iyo Metrobus si loo ogaado loona soo jeediyo dhaqamo si loo ciribtiro tabashooyinka macmiilka ee ku saabsan kusoo laabashada hanaanka Metro Covid-19 kaddib.
- Ka aruurinta jawaabaha macaamiisha Metrobus si loo qiimeeyo guusha mashruuca tijaabada ah kaasoo isticmaalay tusmooyinka cadceedda ku shaqeeya ee e-ink lagana hirgaliyay boosteejooyinka basaska ee ku yaala Columbia Pike si macaamiisha loo siiyo macluumaad wakhti sax ah leh oo ku saabsan Metrobus xataa marka boosteejooyinka basasku aysan lahayn xiriiro koronto.
- Sahminta macaamiisha si loo sameeyo qiyaasta baahida badalidda adeegga gaadiidka ee ay bixiso Metro inta lagu jiro xirnaanshaha iyo dayactirka xarunta iyo hanaanka.
- Sahminta macaamiisha Metro Park & Ride si loo go'aamiyo shaqo wanaagga qaababka safarka ee kala duwan iyo si loo ogaado xaafadaha taageeray soojeedinada kala duwan ee loogu tala galay kordhinta galitaanka xarunta, taasoo u ogolaanaysa daneeyeyaasha in ay sameeyaan soojeedino loo danleeyahay oo loogu tala galay sare u qaadidda saaxiibada madaxa banaan.



Ururka Bulshada (Community Based Organization) (CBO) wuxuu sii wadi doonaa in uu ahaado qaybta ugu muhiimsan ee qorsheyaasha xiriirada ee masgaariicda la qorsheeyay. Xiriiradaan, waxaa maamula Xafiiska Fursadda Shaqaalaysiinta Loo siiman yahay, waxay siiyeen iftiimin qaymo badan go'aanada mashruuca. Dadaalada howlaha baaxadda leh waxaa kujira:

- **Daraasadda Gaadiidka Basaska, 2018-2019:** Daraasaddu waxay ku lug leedahay Madal Talo bixin ee Istaraatiijiyadeed taasoo xubnaheedu kamid yihiin kuwa jooga boosaska hogaaminta ee dowladaha hoose iyo kuwa gobolka, Ururada Bulshada, ganacsatada, kooxaha laga tirada badan yhaay iyo kuwa naafada ah, ururada shaqaalaha, mufakiriinta, iyo bulshada waxbarashada, ayaka oo matalaya fahamka gobolo badan kana bixinaya iftiimin muhiim ah arimaha na saamaynaya.
- **Daraasadda Baaxadda & Isku halaynta Blue/Orange/Silver Line, 2019-hadda:** Daraasaddan socota waxaa kujira Guddiga Ganacsatada & Talo bixinta Bulshada, kaasoo ka kooban wakiilo ka socda kooxaha ganacsatada ah iyo Ururada Bulshada ee kujira meesha la darsayo. Siminaar loogu tala galay Bulshada/Ganacsatada Daneeyeyaasha ayaa sidoo kale la qabtay Oktoobar 2019 si loo aruuriyo dadaalada ku saabsan fahamka horu dhaca ah.
- **Daraasadda Habeen barka & Subaxda hore, 2019-hadda:** Ururada Bulshada kajira gobolka ayaa lagu casuumay in ay ka qaybqaataan kooxaha ay daneeyeyaashu diiradda saarayaan si looga xaajoodo caqabadaha deegaanadoodu ka wajahayaan isticmaalka gaadiidka habayn barka iyo subaxda hore iyo sidaa si lamid ah muhiimadaha deegaankooda. Kooxaha diiradda la saarayo waxaa lagu qaabilay si oonleen ah Juun 2020.

CBO-yada ayaa sidoo kale la weydiiyay in ay siiyaan wax ku biirin soojeedinada kale ee mashruuca ee badan, ay kamidka yihiin: miisaaniyadsanadeedka; daraasadaha basaska ee wadooyinka R1,R2,42,43; dib u dhiska garaashka basaska ee Bladensburg; Goobta Samaynta & Dayactirka Birta culus ee Pennsy; ciribtirka lacagta lagu bixiyo waddooyinka xaddidadan ee Metrobus; ciribtirka Route W9; iyo isbadalada lagu sameeyay goobaha xarunta Deanwood Metrorail, iyo kuwo kale oo badan. CBO-yada waxaa sidoo kale la ogaysiiyay saamaynada kale, oo ay kamid yihiin xiritaanada xarumaha iyo albaabada, adeegyada, nooliga ama khidmadaha baabuur dhigashada, iyo dhismaha.

Metro waxay isticmaashaa xarun xogta lagu kaydiyo oo laga baari karo oo dhexe taasoo ay kujiraan macluumaadka xiriirka ay keeyihiin daneeyeyaasha gudaha ee gobolka, kuwaas aykujiraan wakiilo ka socda hay'adaha adeega bulshada iyo Ururada Bulshada. Xarunta xogta waxaa sii casriyaynaya shaqaalaha waxaana looga faa'idaystaa xiriirada loo danleeyahay ee ku saabsan mashaariicdaan kala duwan.




Metro waxay sii waday in ay raacdo Qorshaha Kaalmada Luuqadda dhammaan istitiraatiijiyadaha xiriirada la qorsheeyay ee mashruuca waxayna leedahay hanaan loo sameeyay si loo taageero dadaaladaan.

## Gaarista Fool-kafoolka ah

Metro waxay ka faaidaysanaysaa qandaraas gaaris wicitaan ah kaasoo bixinaya taageerada falgalka bulshada ee mashaariic badan. Mashruucu wuxuu bixinayaa rogrogidda si loo dhiso kooxo xirfadleyaal ah oo ah dadka ayada oo lagu salaynayo baahida mashruuca, taasoo u baahan karta gaaris la shakhsiyadeeyay oo ku salaysan jinsiga, faraca, isirka, iyo luuqadaha lagu hadlo. Baahiyaha luuqadda waxaa kamid ah, laakiin aan ku ekayn, Amaxaari Shiinees, Faransiis, Kuuriyaan, isbaanish, Vietnamese, iyo Luuqadda Dhegooleyaasha ee Maraykanka (American Sign Language) (ASL). Dhammaan kooxaha gaaristu waxaa sidoo kale loo taba baray in ay wacaan Xafiiska Macluumaadka Macaamiisha ee Metro si loogu xiro laynka wicitaanka kaalmaad luuqadda marka loo baahdo.

Laga bilaabo Janaayo 2018 illaa Maarso 2020 (kahor cudurka safmarka ah ee Covid-19), qandaraaskaan waxaa loo isticmaalay dadaalada soo socda:





| Mashaariicda Kooxda Gaarista Qandaraaska Wicitaanka ah | Wakhtiga loo qorsheeyay | Nooca Gaarista | Shaqaalaysiinta Dadka luuqadaha kala duwan ku hadla* |
|---|---|---|---|
| Soojeedinada Qaybaha Baabuurta la dhigto | Janaayo-Febraayo 2018 | Dhiiri galinta jawaabta macmiilka ee tijaabada ah; aruuri sahan | Isbaanish (50%), Shiinees |
| Soojeedinta Ciribtirka Grosvenor Turnback | Maayo 2018 | Dhiiri gali jawaab celinta macmiilka ee soojeedinta | Isbaanish (50%), Shiinees |
| Isbadalada adeegga basaska | Juun 2018 | Ku wargali macaamiisha waxyaabaha ku saabsan isbadalada adeegga | Isbaanish (50%) |
| Dayactirka Jardiinada iyo Shubka ee West Hyattsville | Maayo-Luuliyo 2018 | Ku wargali macmiilka waxyaabaha ku saabsan xirista goobaha baabuurta la dhigto | Isbaanish (100%) |
| Route 79 *MetroExtra* Tijaabada Bilaa Lacagta | Juun 2018 | Dhiiri galinta jawaabta macmiilka ee tijaabada ah; aruuri sahan | Isbaanish (100%) |
| Adeegga Macaamiisha ee Xarunta Metrorail (Metrorail Station Customer Service) (MLB All-Star Game) | Luuliyo 2018 | Caawi macmiilka xarumaha ku sugan | Isbaanish (50%) |
| Dhismaha Meesha Basku Istaago ee Friendship Heights | Luuliyo-Agoosto 2018 | Ogaysii oo caawi macaamiisha leh boosteejooyinka basaska ee la wareejiyay | Isbaanish (50%) |
| Xirista Laynka Cas ee La dheereeyay | Luuliyo-Agoosto 2018 | Ogaysii oo caawi macaamiisha xarumaha laga xiray | Isbaanish (50%), Amxaari Luuqadda Dhagooleyaasha ee Maraykanka (ASL) |
| Maridda Kaliya ee La dheereeyay ee Laynka Buluugga/Casaanka/Qalinka ah | Luuliyo-Agoosto 2018 | Ogaysii oo caawi macaamiisha adeegooda wax laga badalay | Isbaanish (50%) Amxaari, Kuuriyaan |
| Soo jeedinada Boosteejooyinka Basaska ee Xaddidan ee Bilaa Lacagta ah | Sibteembar 2018 | Dhiiri gali jawaab celinta macmiilka ee soojeedinada; aruuri sahano | Isbaanish (50%) Amxaari, Shiinees |
| Soojeedinada Isbadalada Meelaha baabuurta la dhigto iyo Madalada Khaaska ah | Oktoobar 2018 | Dhiiri gali jawaab celinta macmiilka ee soojeedinada; aruuri sahano | Isbaanish (50%) Amxaari Shiinees, Kuuriyaan |
| Xirnaanshaha Maalmaha todobaadka fasaxa ee La balaariyay Laynka Buluuga ah/Jaalaha ah | Noofambar 2018 | Ogaysii oo caawi macaamiisha xarumaha laga xiray | Isbaanish (50%), Amxaari |
| Xarunta Garaashka Baabuur dhigashada Dib u dayactirka ee Vienna iyo Largo Town | Noofambar 2018 | Ku wargali macmiilka waxyaabaha ku saabsan xirista goobaha baabuurta la dhigto | Isbaanish (50%) |
| Majiro Layn Jaale ah | Noofambar 2018 | Ku wargali macaamiisha waxyaabaha ku saabsan isbadalada adeegga | Isbaanish (50%) Amxaari, Shiinees |
| Daraasadda Qiimaynta Adeegga Riggs Road (routes R1, R2) | Janaayo 2019 | Dhiiri gali jawaab celinta macmiilka ee soojeedinada; aruuri sahano | Isbaanish (50%) |
| Adeegga Macaamiisha ee Xarunta Metrorail: Kulanka Dumarka | Janaayo 2019 | Caawi macmiilka xarumaha ku sugan | Isbaanish (50%) Amxaari Shiinees, Kuuriyaan |
| Xisaab Sanadeedka 2020 Miisaaniyadda | Janaayo 2019 | Dhiiri gali jawaab celinta soo jeedinada; aruuri sahano | Isbaanish (50%) Amxaari Shiinees, Kuuriyaan |
| Maalinka Badalidda ee Metro: Wax soo saarada Gudbidda | Luuliyo-Sebteembar 2019 | Ogaysii macaamiisha waxyaabha ku saabsan wax soo saarada ka gudbidda | Isbaanish (50%), Amxaari |
| Xaaladda Shaqada Wanaagsan ee Metrobus | Sibteembar 2019 | Dhiiri gali jawaab celinta soo jeedinada; aruuri sahano | Isbaanish (50%), Amxaari |
| Saamaynada Laynka Dameeriga uu ku leeyahay Xarunta New Carrollton Metrorail | Noofambar 2019 | Ku wargali macmiilka waxyaabaha ku saabsan xirista goobaha baabuurta la dhigto | Isbaanish (50%) |
| Saamaynada Laynka Dameeriga uu ku leeyahay Xarunta Gaadiidka Silver Spring | Diiseembar 2019-Janaayo 2020 | Ogaysii oo caawi macaamiisha leh boosteejooyinka basaska ee la wareejiyay | Isbaanish (50%), Amxaari |
| Xisaab Sanadeedka 2021 Miisaaniyadda | Febraayo 2020 | Dhiiri gali jawaab celinta soo jeedinada; aruuri sahano | Isbaanish (50%), Amxaari Faransiis, Kuuriyaan |

**Boqoleyda tusaysa boqolayda dhammaan xubnaha kooxda gaarista ee ku hadlay luuqaddaad.*

Mashaariicda kale ee lagu taageero baabuurta kale ee qandaraaska sidoo kale waxay u baahnaayeen kooxo gaaris oo luuqado badan yaqaana. Kuwaan waxaa kamid ah:

| Mashaariicda Kooxda Gaarista Qandaraaska Wicitaanka ah | Wakhtiga loo qorsheeyay | Nooca Gaarista | Shaqaalaysiinta Dadka luuqadaha kala duwan ku hadla* |
|---|---|---|---|
| Mount Pleasant Line (wadooyinka 42, 43) iyo Connecticut Avenue Line (routes L1, L2) Daraasadda Qiimaynta Adeegga | Maayo 2018 | Dhiiri gali jawaab celinta soo jeedinada; aruuri sahano | Isbaanish |
| mashruuca Gaadiidka Baska | Sebteembar-Noofambar 2018 Maayo 2019 | Dhiiri gali jawaab celinta soo jeedinada; aruuri sahano | Isbaanish, Amxaari |
| Mashruuca Horumarinta Madasha Xagaaga 2019 | Maajo-Sebteembar 2019 | Ogaysii oo caawi macaamiisha xarumaha laga xiray | Amxaari, Shiinees, faransiis, Kuuriyaan, Boortaqiis, Isbaanish, Luuqadda Dhegooleyaasha ee Maraykanka (American Sign Language) (ASL) |
| Daraasadda Isku halaynta iyo Awoodda ee Laynka Buluugga/Casaanka/Qalinka ah | Juun-Luuliyo 2019 | Ku wargali macaamiisha daraasadda | Isbaanish |

Marka lagu daro howlahaas, shaqaalaha Metro waxay dib u eegeen qorsheyaasha gaarista ee mashaariicda dhismaha ee ku lamaansan si loo xaqiijiyo in baahiyaha kaalmada luuqadda la tixgaliyay, sida Mashruuca Sare u qaadidda Helitaanka King Street-Old Town Metro, kaasoo ay kujireen xubno katirsan koox u fasiraysay Isbaanish iyo Amxaari.

Metro waxay sidoo kale qabatay guryo furan oo badan iyo dhegaysiga dadweynaha waxayn ku dartay shaqaale labada luuqadood ku hadla oo qayb ka ah qorsheyaashooda shaqaalenimo. Marka laga codsado, Metro waxay lahayd tarjumaano goobta ku sugan.

Marka loo baahdo, mutadawiciinta shaqaalaha Metro, oo loo yaqaano Dadka Macluumaadka Metro (MIPs), ayaa caawinayay macaamiisha inta lagu jiro dhacdooyinka wadidda faraha badan ama xirnaanshaha xarunta. Dadka Macluumaadka Metro (MIP) waxay furteen foom ay kujiraan goobta mutadawiciinta si ay usoo qoraan luuqadaha kale ee ay sida wanaagsan ugu hadli karaan marka laga tago Ingiriiska. Ayada oo lagu salaynayo macluumaadkaan, MIP-yada leh xirfadda luuqadaha ayaa la dhigayaa goobaha istiraatiijiga ah ee leh dadweynaha aadka u badan ee xirfaddooda luuqadda Ingiriisku kooban tahay marka loo baahdo.




## Xiriirka Qoran

Metro waxay sii wadaysaa in ay tarjunto dhammaan waxyaabaha muhiimka ah kuwaas oo qayb ka ah xiriirada mashruuca. Ayada oo ay ku xiran tahay dadweynaha la saameeyay, Metro waxay sida caadiga ah isticmaashaa tarjumaad xirfadaysan oo loogu tala galay waxyaabaha soo socda:

- **Xayaysiinada** ku qoran daabacaadaha aan Ingiriiska ahayn
- **Buuggaagta macluumaadka yar/jeebgashiga/qoraalada yaryar**
- **Bogga webseetka mashruuca iyo la taliyeyaasha.** Ogsoonow in wmata.com ay sidoo kale leedahay qalabka tarjumaadda Google oo loogu tala galay luuqadaha Shiinees, Faransiiska, Kuuriyaanka, Isbaanishka, iyo Vietnamese.
- **Faafinta warbaahinta** baaxadda leh/saamaynta kaliya
- **Ogaysiisyada dhegaysiga dadweynaha** iyo waxyaabaha dukumiintiga ah
- **Calaamadaha** (ogaysiisyada, waado helidda, soojeedinada, iyo wixii lamid ah)
- **Sahanada** (warqadda iyo onleenka)

Waxyaabaha ku saabsan mashaariicda baaxadda leh, waxyaabaha qoran waxaa kamid ah sida caadiga ah warbixin oonleen ah oo ku qoran luuqado badan taasoo bixinaysa macluumaad ku saabsan sida loo helo macluumaad dheeraad ah oo ku qoran luuqadda ay doorbidayaan.

# Bilaabidda Kooxda Shaqada Sinaanta ee Metro

Ayada oo la aqoonsanayo fahamka ah in dhammaan dadku aysan ka bilaabayn helitaan isku mid ah oo ah fursadaha iyo in helitaan la'aanta gaadiid la isku halayn karo, ku filan, lana awoodo ay tahay inta ugu badan caqabadda ugu weyn si kor loogu socdo si fudud u wareegidda, Metro waxay bilowday “Koox Howleedka Equity” 2019kii si ay Maamulka si wanaagsan ugu diyaariso kaalintiisa wax ka qabashada sinaanta dhaqaalaha iyo faraca.

Ujeeddada hore ee kooxdaan waxay ahayd in ay qoraan xaaladaha fududaanta sinaanta gobol ahaan iyo barta macaamiisha Metro dhexdooda iyo sidaa si lamid ah ogaanshaha waddooyinka imaan kara si loo kordhiyo muuqashada iyo muhiimadda tixgalinta sinaanta kajirta go'aan gaarista Metro. Mid kamid ah natiijooyinkii ugu horeeyay ee kooxda, Equity Primer, waa barta bilowga ah ee muujinta la ogyahay iyo ku tala galka.






# Tababarka



Si loo xaqiijiyo qaadashada iskumidka ah ee lagu guulaysto ee hanaanka xiriirada mashruuca Metro ay qorshaysay iyo in la xaqiijiyo fahamka Maamulka oo dhan ka dhex jira ee shuruudaha Xeerka VI (Title VI) ee ka qayb qaadashada bulshada, shaqaaluhu waxay sii wadaan in tababaro u qabtaan Maamuleyaasha Mashruuca iyo shaqalaha kaalmada.

Ilaa 2017, in ka badan 100 maamuleyaal mashruuc iyo shaqaale ah ayaa xaadiray tababarka PPP. Laba tababaro ayaa la dhammaystiray intii u dhexaysay Janaayo 2017 iyo Maarso 2020. Waxyaabaha lagu tababaro, oo uu la socdo muuqaal "Gogol dhigga Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha" ah, ayaa ugu diyaar ah shaqaalaha *Metroweb*, Metro's Intranet.

Dhammaystirka tababarada ayaa hadda la diiwaangaliyay, waxaana lagu daba galay loogana warbixiyay Hanaanka Maaraynta Barashada Ganacsiga PeopleSoft ee Metro.

| Xiliga | # Ka qayb qaateyaasha | Ajendaha | Natiijooyinka Jawaab celinta |
|---|---|---|---|
| Soo bandhigidda Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha<br>*Febaraayo 27, 2018*<br>Dhismaha Jackson Graham<br>600 5th St NW, Washington DC | 25 maamuleyaal iyo shaqaale iskugu jira oo leh xiriiro iyo gaaris | • Soo bandhigidda muuqaalka Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha<br>• Fahmidda Dadweynaha La saamaynayo<br>• Tilmaamaha Xiriirada iyo Gaarista Mashruuca La qorsheeyay | • 25% waxay dareemeen in aysan xoogaa fahmin PPP tababarka kahor.<br>• 80% waxay fahmeen PPP in badan ama waxay ahaayeen kuwo khabiir ku ah tababarka kaddib.<br>• 94.74% waxay dareemeen in wakhtigooda la qiimeeyay.<br>*Soojeedinada sare u qaadidda:* Tusaalooyin dheeraad ah |
| Hanaanka Maaraynta Ka qayb qaadashada Dadweynaha (Public Participation Management System) (PPMS)<br>*Febaraayo 28 iyo Maarso 6, 2018*<br>Dhismaha Jackson Graham<br>600 5th St NW, Washington DC<br>(shaybaarka kombuyuutarka)<br>*Maarso 2, 2018*<br>Goobta Carmen Turne 3500 Pennsy Drive Hyattsville, MD<br>(shaybaarka kombuyuutarka) | 14 maamuleyaal mashruuc ah ama madaxa xiriirka waaxyada | • Kaalimaha isticmaalaha PPMS<br>• Dulmarka Hanaanka<br>• Deegaanka Tababarka<br>• Wax ku biirinta Mashruuca Cusub (Shaqooyinka) | • 34% waxay dareemeen in aysan fahmin ama aysan xoogaa fahmin PPMS kahor tababarka.<br>• 79% waxay dareemeen in ay fahmeen PPMS si aad ah waxayn anoqdeen khabiiro tababarka kaddib.<br>• 100% waxay dareemeen in wakhtigooda la qiimeeyay.<br>*Soojeedinada sare u qaadidda:* Wakhti dheeraad ah oo lagu bixiyo qaybta kasta oo ah hanaanka PPMS |
| Soo bandhigidda Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha<br>*Diiseembar 13, 2019*<br>Dhismaha Jackson Graham<br>600 5th St NW<br>Washington DC | 45 maamuleyaal iyo shaqaale iskugu jira oo leh xiriiro iyo gaaris | • Soo bandhigidda muuqaalka Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha<br>• Fahmidda Dadweynaha La saamaynayo<br>• Tilmaamaha Xiriirada iyo Gaarista Mashruuca La qorsheeyay | • 71% waxay dareemeen in aysan xoogaa fahmin PPP tababarka kahor.<br>• 81% waxay fahmeen PPP in badan ama waxay ahaayeen kuwo khabiir ku ah tababarka kaddib.<br>• 100% waxay dareemeen in wakhtigooda la qiimeeyay.<br>*Soojeedinada sare u qaadidda:* Tusaalooyin dheeraad ah; dulmar hanaanka mashruuca dhabta ah |
| Ku ogaanshaha Hab dhaqanka Macmiilka Siminaarka Cilmibaarista<br>*Diiseembar 13, 2019*<br>Dhismaha Jackson Graham<br>600 5th St NW<br>Washington DC | 32 maamuleyaal iyo shaqaale iskugu jira oo leh xiriiro iyo gaaris | • Shaqada darsidda xaaladda<br>• Soosaarista su'aalaha shaqada<br>• Ogaanshaha su'aalaha cilmibaarista ee imaan kara<br>• Noocyada macluumaadka looga baahan yahay in looga jawaabo su'aalaha cilmibaarista | Aan khusaynin |

Ayada oo lagu salaynayo talooyinka ka imaanaya daabacaadda koowaad Qorshaha Ka qayb qaadashada Dadweynaha, Metro waxay samaysay xafiis dhexe 2015 si uu u maareeyo dhammaan howlaha ka qayb qaadashada bulshada ee mashruuca ku salaysan, iyo sidaa si lamid ah in uu siiyo iftiimin iyo isku dubarid ka qayb qaadashada bulshada. Wajiga kowaad inta lagu jiro, kooxda Barnaamijka Ka qayb qaadashada Bulshada waxaa kamid ah Maamulaha Barnaamijyada Ka qayb qaadashada Dadweynaha iyo laba Sarkaal oo Khaas ah oo Mashruuca loogu tala galay kuwaas oo ka tirsan Xafiiska Xiriirada Dadka waxayna la shaqeeyaan waaxyaha kale sida Xaafiiska Fursadda Shaqaalaysiinta Loo simanyahay, kaasoo maareeyay xiriirada iyo gaarista UruradaBulshada.

Ayada oo uu jiro koritaanka taariikhda barnaamijka lacagta Metro iyo kororka mashaariicda iyo hindisooyinka ku hareeraysan siyaasadda, qorshaynta, dhismaha/dayactirka, sare u qaadidda wadajirka ah, iyo dhismaha ku lamaan, dib u qaabaynta iyo balaarinta kooxda ayaa loo baahday si loo buuxiyo baahiyaha. Xafiis cusub oo ah Macluumaadka iyo Xiriirada Istiraatiijiyadaysan ayaa la sameeyay Maarso 2020, kaasoo uu hogaaminayo Agaasime Sare si uu xiriir u siiyo maamulka mashruuca, soosaarista macluumaadka, iyo barnaamijyada gaarista, samaynta xiriiro wadashaqayn oo lala yeesho daneeyeyaasha, lana xaqiijiyo u hogaansamidda Qorshaha Ka qayb qaadashada Bulshada ee Metro iyo shuruudaha FTA. mada ee dheeraadka ah marka la gaaro Juun 2020 oo uu kujiro Agaasimaha Xiriirka & ka qayb qaadashada Mashruuca La qorsheeyay uu la yeelanayo Maamuleyaasha Xiriirada Istiraatiijiyada ah iyo Maamulaha Gaarista asaga oo warbixin toos ah siinaya, sidaa si lamid ah Maamulaha Istuudyaha Macluumaadka.

Kooxdu waxay sii wadaysaa in ay si dhow ula shaqayso xafiisyada kale ee katirsan hay'adda si ay isugu duba ridaan mashaariicda una xaqiijiyaan u hogaansamidda. Kooxdu waxay la kulmaysaa wakiilo ka socda Xafiiska Cilmibaarista Macamiilka, Adeegga Macaamiisha, Xiriirada Dowladda, Suuqgeynta, iyo Xiriirada Warbaahinta si joogto ah si loogala xaajoodo mashaariicda soo socota loona qeexo istiraatiijiyadaha xiriirka iyo tabaha. Kooxdu waxay sidoo kale labadii todobaadba mar la kulantaa wakiilada ka socda xafiiska yada kale ee saaxiibada ah —Xafiisyada ADA ee Siyaasadda iyo Qorshaynta, Cilmibaarista Macmiilka, Fursadda Shaqaalaysiinta Loo siman yahay, iyo Qorshaynta — si loo xaqiijiyo dadyowga iyo u hogaansamidda Xeerka VI (Titl VI) ee mashaariicda hadda socota iyo kuwa soo socda.



# La qabsiga Xaaladda caadiga ah ee Cusub

Ayada oo dunidu sii waddo ka jawaabista safmarka Covid-19, Metro waxay dib uga fikiraysaa waxa mustaqbalka wada xiriirka iyo ka qayb qaadashada bulshadu u ekaan doonaan. Ayada oo ay jireen guulo gaaris ah oo fara badan oo lagu dhisay is dhexgalka fool-ka-foolka ah, hadday tahay madal degdeg ah, Metro waa in ay balaarisaa xirfadaheeda si ay ugu soo darto tabo cusub iyo istaraatiijiyado kaasoo la howl gala ilaaliyana waxyaabaha kujira.

Marka lagu daro u wareegidda kulamada fogaan aragga ah, Metro waxay si dhakhso ah u gaysay qalab macluumaadka ilaaliya bilihii hore ee ka jawaabidda cudurka safmarka ah si loo sii wado ogaysiisyada macmiilka ee fool-ka-foolka ah ayada oo ilaalinaysa badqabka macaamiisha iyo kooxda gaarista. Ayada oo ay sabab u tahay taariikhda gaadiid wadidda oo hoosaysa inta lagu jiro ka jawaabidda safmarka Covid-19, Metro waxay dhistay barnaamij shaqo oo markasta ah si loo sii wado xaaladda dadaalada ilaalinta dayactirka wanaagsan, taasoo keentay dansanaansho todobaad qaadatay oo kajirta mid kamid ah afarta xarumood todobaad kasta. Kooxaha gaarista macmiilka waxay isticmaaleen teendhooyin cusub oo macluumaad ah kaasoo leh waxyaabo wax celiya oo caag ah, tabeelooyin macluumaad oo aan xiriir lahayn, iyo calaamado waaweyn oo leh koodhadh QR ah kuwaas oo gacan ka gaysanaya yaraynta isdhexgalka jirka maraka la bixinayo ogaysiisyada fool-ka-foolka ah ee muhiimka ah. Teendhooyinkaan ayaa la diyaariyaa subax kasta waxaana la qaadaa dhammaadka maalin walba si loosoo nadiifiyo. Teendhooyinku waxay ku yaaleen xarumo la saameeyay hal todobaad oo ka horeysa xiritaanka, ayada oo kooxo gaaritaan oo gaar ah laga howlgaliyay xarumaha inta lagu jiro xirnaanshaha si ay uga caawiyaan tilmaamaha iyo su'aalaha gaadiidka basaska.

Sida in badan oo kamid ah hay'adaha gaadiidka ee qayrkeeda ah lagu xusay *Gunaanadka C: Dib u eegista Hay`adda Gaadiidka Peer(Peer Transit Agency),*, Metro waxay ka fikiraysaa qaabab dheeraad ah oo ay u isticmaasho teknoolojiyadda si ay ugu qaybiso waxyaabaha badalka ah, qabashada kulamada ama madalada iyo aruurinta jawaabcelinada. Daneeyeyaasha iyo Ururada Bulshadu waxay sidoo kale kaalin weyn ka ciyaari doonaan go'aaminta kanaalada ku habboon ee lagu gaari karo macaamiisha iyo xubnaha bulshada ee Metro, khaasatan kuwa ah bulshada ay adag tahay in lagaaro.

